



# ► Siyaasadda qaranka ee socdaalka shaqada: istiraatijiyadda hirgelinta iyo qorshaha waxqabadka



Supported by:



International  
Labour  
Organization



Better  
Regional  
Migration  
Management



IOM  
UN MIGRATION



- ▶ **Siyaasadda qaranka ee socdaalka shaqada: istiraatijiyadda hirgelinta iyo qorshaha waxqabadka**

© International Labour Organization 2025.

First published 2025.



Attribution 4.0 International (CC BY 4.0)

This work is licensed under the Creative Commons Attribution 4.0 International. See: [creativecommons.org/licenses/by/4.0](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0). The user is allowed to reuse, share (copy and redistribute), adapt (remix, transform and build upon the original work) as detailed in the licence. The user must clearly credit the ILO as the source of the material and indicate if changes were made to the original content. Use of the emblem, name and logo of the ILO is not permitted in connection with translations, adaptations or other derivative works.

**Attribution** – The user must indicate if changes were made and must cite the work as follows: ILO, *Siyaasadda qaranka ee socdaalka shaqada: istiraatiijiyadda hirgelinta iyo qorshaha waxqabadka*, Geneva: International Labour Office, 2025. © ILO.

**Translations** – In case of a translation of this work, the following disclaimer must be added along with the attribution: *This is a translation of a copyrighted work of the International Labour Organization (ILO). This translation has not been prepared, reviewed or endorsed by the ILO and should not be considered an official ILO translation. The ILO disclaims all responsibility for its content and accuracy. Responsibility rests solely with the author(s) of the translation.*

**Adaptations** – In case of an adaptation of this work, the following disclaimer must be added along with the attribution: *This is an adaptation of a copyrighted work of the International Labour Organization (ILO). This adaptation has not been prepared, reviewed or endorsed by the ILO and should not be considered an official ILO adaptation. The ILO disclaims all responsibility for its content and accuracy. Responsibility rests solely with the author(s) of the adaptation.*

**Third-party materials** – This Creative Commons licence does not apply to non-ILO copyright materials included in this publication. If the material is attributed to a third party, the user of such material is solely responsible for clearing the rights with the rights holder and for any claims of infringement.

Any dispute arising under this licence that cannot be settled amicably shall be referred to arbitration in accordance with the Arbitration Rules of the United Nations Commission on International Trade Law (UNCITRAL). The parties shall be bound by any arbitration award rendered as a result of such arbitration as the final adjudication of such a dispute.

For details on rights and licensing, contact: [rights@ilo.org](mailto:rights@ilo.org). For details on ILO publications and digital products, visit: [www.ilo.org/publns](http://www.ilo.org/publns).

ISBN: 9789220430453 (print); 9789220430460 (web PDF)

**Also available in English:** *National labour migration policy: Implementation strategy and action plan of Somalia*, ISBN 9789220421574 (print); 9789220421581 (web PDF)

The designations employed in ILO publications and databases, which are in conformity with United Nations practice, and the presentation of material therein do not imply the expression of any opinion whatsoever on the part of the ILO concerning the legal status of any country, area or territory or of its authorities, or concerning the delimitation of its frontiers or boundaries. See: [www.ilo.org/disclaimer](http://www.ilo.org/disclaimer).

The opinions and views expressed in this publication are those of the author(s) and do not necessarily reflect the opinions, views or policies of the ILO.

Reference to names of firms and commercial products and processes does not imply their endorsement by the ILO, and any failure to mention a particular firm, commercial product or process is not a sign of disapproval.

Printed in Ethiopia

**Photo credits**

Cover: © ILO

## ► Tusmo

Qeexidda Eray Bixinta iyo Magacyada La Soo Gaabiyay (Acronyms and abbreviations).....	4
<b>Guudmarka kooban</b> .....	5
Himilooyinka.....	5
Hiigsiga .....	5
Ujeeddada .....	5
Aragtida Istiraatiijiyadda Isbeddelka.....	5
Kormeerka, Qiimeynta, iyo Nidaamka Natijoooyinka .....	5
Kheyraadka(Kharashaadka) loo Baahan Yahay.....	6
Khataraha La filan karo .....	6
Muddada Hirgelinta (Time Frame).....	7
<b>1. Hordhac</b> .....	8
1.1. Sooyaal iyo Xaaladda (Background and Context).....	8
1.1.1. Socdaalka iyo Isbeddelada La Xiriira ee Soomaaliya .....	8
1.1.2. Qaxooti iyo Codsiyada Magangalyada .....	9
1.1.3. Socdaalka Gudaha iyo Soo-galootiga (Inbound Migration).....	9
1.1.4. Socdaalka Dibedda .....	9
1.1.5. Ka-qaybgalka Jaaliyadda Soomaaliyeed (Diaspora Engagement) .....	10
1.1.6. Lacagaha Ay Dibadda Ka Soo Direen Jaaliyadda Soomaaliyeed (Remittances).....	10
1.1.7. Sababaha Socdaalka.....	10
1.1.8. Qurba Joogta Soomaaliyeed (Somalia's Diaspora).....	11
1.1.9. Falanqaynta (Awoodaha, Fursadaha, Daciifnimada, iyo Khataraha) SWOT .....	13
<b>2. Ku saabsan siyaasadda qaranka ee socdaalka shaqalaha</b> .....	16
Ujeedooyinka Istiraatiijiga ah ee Siyaasadda (Policy Strategic Objectives).....	17
<b>3. Qeybaha muhiimka ah ee hirgelinta (Priority areas for implementation)</b> .....	18
<b>4. Aragtida is-beddelka</b> .....	22
4.1. Istiraatiijiyadda La Dhaqan Gelinayo Iyadoo La Adeegsanayo Aragti Is-bedel (Theory of Change) .....	22
<b>5. Doorarka iyo mas'uuliyadaha daneyaash</b> .....	26
<b>6. Khatarooyinka, caqabadaha iyo qiyaasaha la fili karo</b> .....	32
6.1. Khaatarooyinka iyo Caqabadaha .....	32
6.2. Qiyaasaha.....	33
<b>7. Wakhtiga iyo himiloyinka la gaarayo</b> .....	34
<b>8. Dabagalka, qiimeynta kormeerka &amp; qaab-dhismeedka natijoooyinka (m&amp;e and results framework)</b> .....	36
8.1. Ujeedooyinka iyo isticmaalayaasha qaab-dhismeedka natijoooyinka.....	36
8.2. Gaaritaanka Yoolka, Bartilmaameedka iyo Natijoooyinka .....	39
Tusiyaha Heerka Natijada.....	39
Qeybaha Muhiimka ah ee Natijoooyinka/Soosaarka (Key Results/Output Areas).....	39
8.3. Qaab-dhismeedka Warbixinta (Reporting Arrangements).....	41
8.4. Shaxda Natijoooyinka (Results Framework Matrix).....	41
<b>9. Kaydidaha loo baanu qabo</b> .....	54
9.1. Shuruudaha Kharashka.....	54
9.2. Ilaha Maalgelinta.....	55
9.3. Mas'uuliyadda.....	56

## ► Gogol-dhig

Socdaalka shaqada wuxuu door muuqda oo taariikhi ah ka qaatay socdaalka horumarineed ee Soomaaliya, isagoo kobciyay hab-nololeedka bulshada, shaqaalena u horseeday xirfado cusub, isla markaana suurtageliyay in dalka soo gaaraan lacagaha ay soo diraan jaaliyadaha Soomaaliyeed, kuwaas oo taageera malaayiin qoys.

Soomaaliya, oo ah dal diritaan, soo-galitaan isla markaana marin u ah socdaalka gobolka iyo caalamka, waxay ku taallaa goob istiraatiiji ah oo muhiim u ah dhaq-dhaqaaqyada socdaalka shaqaalaha. Si kastaba ha ahaatee, muddada dheer waxaa dalka ka maqnaa hannaan qaran oo mideysan oo hagaya kana jawaabaya welwelka socdaalka shaqada, taas oo sababtay in shaqaalaha Soomaaliyeed ee socdaalka ah ay u nuglaadaan xaalado aan amni ahayn, xadgudubyo shaqo, iyo ilaalin kooban.

Siyaasaddan Qaran ee Socdaalka Shaqada waa guul-daahfur qaran oo taariikhi ah. Waa hannaan qaran oo u heellan in uu qeexo, una dejiyo hab cad oo ku saleysan xuquuqda aadanaha, sinnaanta jinsiga, iyo ka-mid noqoshada bulshada, si loo maareeyo loona habeeyo socdaalka shaqada gudaha iyo dibadda.

Siyaasaddan waxay si waafi ah u muujinaysaa aragtida Dowladda Federaalka Soomaaliya ee ku aaddan dhiirrigelinta socdaal shaqo oo ammaan ah, nidaamsan, sharciyeysan oo joogto ah, iyadoo la ilaalinayo xuquuqda shaqaalaha, la xoojinayo isku-duwidda hay'adaha, lana kordhinayo doorka jaaliyadda Soomaaliyeed ee qurbaha ku nool ay ku leeyihiin horumarinta qaranka.

Siyaasaddan waxay ku tiirsan tahay mabaadi'da shaqo-wanaagga, maamul-wanaagga, iyo caddaaladda bulshada. Waxay sidoo kale la jaanqaadaysaa heerarka caalamiga ah ee shaqada iyo fulinta heshiisyada iyo qaabdhismeedyada gobolka iyo caalamka, oo ay ka mid yihiin Yoolalka Horumarka Waara (SDGs), Heshiiska Caalamiga ah ee Socdaalka (GCM), Heshiisyada Hay'ada Shaqaalaha Aduunka ee Qaramada Midoobay (ILO), iyo qaababka Midowga Afrika ee maamulka socdaalka.

Waxa kale oo ay ka dhisan tahay Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP), Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP), iyo Xeerka Shaqada ee dhawaan la cusboonaysiiyay. Waxaa si gaar ah diiradda loo saaray arrimo is-dhexgala sida sinnaanta jinsiga, ka mid noqoshada dadka naafada ah, adkaysiga cimilada, horumarinta xirfadaha dhalinyarada, iyo kuwa dhijitaalka iyadoo la hubinayo in aan cidna laga tagin.

Siyaasaddan waxaa lagu diyaariyey hannaan ku dhisan ka-qaybgal, wadatashi, iyo la-talin ballaaran, waxaana ka soo qayb qaatay hay'adaha dowladda, bah-wadaagta shaqada, bulshada rayidka, iyo hay'adaha caalamiga ah. Waa natiijada hab awood-wadaag iyo wadajir uga yimid dowladda iyo bulshada, kuna dhisan wadahal bulsho iyo go'aan-qaadasho wadajir ah.

Waxaan u mahadcelinayaa Hay'ada Shaqaalaha Aduunka ee Qaramada Midoobay (ILO), oo taageero farsamo iyo mid dhaqaale ku bixiyay Barnaamijka Maareynta Wanaagsan ee Socdaalka Gobol (BRMM Phase II) intii lagu guda jiray diyaarinta siyaasaddan. Sidoo kale, waxaan si gaar ah ugu mahadcelinayaa Xafiiska Arrimaha Dibadda, Barwaaqo-sooranka & Horumarinta ee Boqortooyada Midowday ee ingiriiska (FCDO) taageeradooda joogtada ah ee ILO BRMM.

Waxay sidoo kale mudan mahadcelin dhammaan daneeyayaasha kaalin muuqata ka qaatay hirgelinta dukumeentigan muhiimka ah ee heer qaran.

Siyaasaddan waxay qeexaysaa faragelinno istaraatiiji ah oo ku saabsan siddeed meelood oo mudnaanta leh, oo ay ka mid yihiin: xoojinta maamulka socdaalka shaqada, nidaaminta shirkadaha shaqaaleynta gaarka loo leeyahay, ballaarinta ilaalinta bulshada iyo xuquuqda shaqaalaha, taageeridda soo-laabashada iyo dib-u-dhexgelinta, iyo horumarinta kaalinta jaaliyadaha Soomaaliyeed ee dibadda.

Hirgelinta siyaasaddan waxaa qaban doona isku-duwid hay'adeed oo xooggan, go'aan-qaadasho ku saleysan xog, iyo habab maalgelin oo waara. Dowladda waxay sii wadi doontaa wadhadalka iyo iskaashiga lala yeelanayo bah-wadaagta shaqada, dowlad-goboleedyada, iyo bah-wadaagta caalamiga ah.

Aniga oo ah Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, waxaan sharaf weyn ah inaan soo bandhigo siyaasaddan oo ah tiir-dhexaadka aragtida fog ee Soomaaliya ee ku saabsan nidaaminta socdaalka shaqada si caddaalad, habaysan, waqti-ku-habboon oo waafaqsan heerarka caalamiga ah.

Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay mar kale xaqiijinaysaa sida ay uga go'an tahay dhaqan-gelinta siyaasaddan si loo hubiyo in socdaalka shaqadu noqdo il fursad, ilaalin oo sharaf iyo barwaaqo u horseeda dhammaan shaqaalaha Soomaaliyeed iyo qoysaskooda.

**Prof. Salim Alio Ibro**  
**Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada**  
**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

January 2026



## ► Qeexidda Eray Bixinta iyo Magacyada La Soo Gaabiyay (Acronyms and abbreviations)

---

<b>AU</b>	Midowga Afrika (African Union)
<b>BLMAS</b>	Heshiisyada Laba-geesoodka ah ee Socdaalka Shaqaalaha (Bilateral Labour Migration Agreements)
<b>COMESA</b>	Suuqa Wadajirka ah ee Bariga iyo Koonfurta Afrika (Common Market for Eastern and Southern Africa)
<b>CSOs</b>	Urrrada Bulshada Rayidka ah (Civil Society Organizations)
<b>DTM</b>	Habka Raadraaca Barakaca (Displacement Tracking Matrix - IOM)
<b>DWCP</b>	Barnaamijka Shaqooyinka Wanaagsan ee Dalalka (Decent Work Country Programme)
<b>EAC</b>	Bulshada Bariga Afrika (East African Community)
<b>ESCSA</b>	Guddiga Dhaqaalaha iyo Bulshada ee Galbeedka Aasiya (Economic and Social Commission for Western Asia)
<b>FESTU</b>	Xiriirka Urrrada Shaqaalaha Soomaaliyeed (Federation of Somali Trade Unions)
<b>FMPT</b>	Socdaalka Xorta ah ee Dadka iyo Xoolaha (Free Movement of Persons and Transhumance)
<b>FMS</b>	Sahanka La-socodka Socdaalka (Flow Monitoring Survey)
<b>FMS</b>	Dowlad-Goboleedyada Federaalka (Federal Member States)
<b>GCM</b>	Heshiiska Caalamiga ah ee Socdaalka Badbaadsan, Nidaamsan, iyo Joogtada ah (Global Compact for Safe, Orderly and Regular Migration)
<b>GDP</b>	Wax-soo-saarka Guud ee Qaranka (Gross Domestic Product)
<b>IDPs</b>	Dadka Gudaha ku Barakacay (Internally Displaced Persons)
<b>IGAD</b>	Urur-goboleedka Horumarinta ee IGAD (Intergovernmental Authority on Development)
<b>ILO</b>	Urrurka Shaqaalaha Adduunka (International Labour Organization)
<b>IOM</b>	Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka (International Organization for Migration)
<b>M&amp;E</b>	Kormeerka iyo Qiimeynta (Monitoring and Evaluation)
<b>MDAs</b>	Wasaaradaha, Waaxyaha, iyo Hay'adaha Dowladda (Ministries, Departments and Agencies)
<b>MOLSA</b>	Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (Ministry of Labour and Social Affairs)
<b>MWSS</b>	Nidaamka Taageerada Shaqaalaha Socdaalaya (Migration Worker Support System)
<b>NBS</b>	Hay'adda Istaatitikada Qaranka (National Bureau of Statistics)
<b>NCM</b>	Hab-maamuuska Isku-xirka Qaranka (National Coordination Mechanism)
<b>NDP</b>	Qorshaha Horumarinta Qaranka (National Development Plan)
<b>NGOs</b>	Urrrada Aan Dowliga Ahayn (Non-Governmental Organizations)
<b>NLFS</b>	Sahanka Qaranka ee Awoodda Shaqaalaha (National Labour Force Survey)
<b>PEAs</b>	Shirkadaha Shaqaaleysiinta Gaarka loo Leeyahay (Private Employment Agencies)
<b>SDGs</b>	Hadafyada Horumarka Waara (Sustainable Development Goals)
<b>SWOT</b>	Awoodaha, Daciifnimada, Fursadaha, iyo Caqabadaha (Strengths, Weaknesses, Opportunities, and Threats)
<b>TVETs</b>	Machadyada Waxbarashada Farsamada iyo Tababarka Xirfadaha (Technical and Vocational Education and Training Institutions)
<b>UNHCR</b>	Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga (United Nations High Commissioner for Refugees)

## ► Guudmarka kooban

---

Ku Saabsan Siyaasadda Qaranka Ee Socdaalka Shaqalaha Ee Soomaaliya

Siyaasadda Qaranka ee Socdaalka Shaqalaha waxay ujeedadeedu tahay in la dhiso nidaam ilaalinaya oo awood siinaya shaqaalaha socdaalaya, iyada oo la xoojinayo doorkooda horumarinta qaran ee Soomaaliya. Siyaasaddu waxay ka kooban tahay qodobbadan soo socda:

### Himilooyinka

Nidaam waara, isku-dhafan, xoojinaya sinnaanta jinsiga, kuna salaysan xuquuqda shaqaalaha, si loo gaaro horumar qaran.

### Hiigsiga

Dhisidda qaab-dhismeed dhameystiran oo cadaalad ah, kaas oo fududeynaya socdaalka shaqo ee badqab leh, nidaamsan, iyo sharciyeysan.

### Ujeeddada

Ka faa'iidaydiga ugu badan ee shaqaalaha gudaha iyo dibadda u socdaalaya si loo gaaro horumar iyo barwaaqo.

### Aragtida Istiraatiijiyadda Isbeddelka

Aragtida isbeddelka waxay xooga saartaa dhisidda nidaam waara oo loogu talagalay maareynta socdaalka shaqaalaha. Tani waxay lagu gaari doonaa iyadoo la dhisayo qaab-dhismeed mideysan oo taageeraya tallaabooyinka xaqiijinaya hirgelinta siyaasadda xuquuq ku saleysan iyo la-tixgeliyay jinsiga.

Muddada dheer, Dowladda waxay hubin doontaa in la dejiyo sharciyo, oo ay ugu horreyso dib-u-eegista Xeerka Shaqada Qaranka iyo dhaqan-gelinta Heshiisyada Caalamiga ah ee ILO ee la xiriira socdaalka shaqaalaha, si loo xaqiijyo socdaal shaqo oo nabdoon, nidaamsan, iyo sharciyeysan.

Muddada dhexe, Dowladda waxay la shaqeyn doontaa habka Saddex-geesoodka ah (Tripartite arrangement) si ay u taageerto wada-hawlgalayaasha bulshada horumarinta ilaalinta xuquuqda shaqaalaha gudaha iyo dibadda u socdaalaya. Tani waxay ku lug yeelan doontaa kor-u-qaadista horumarinta xirfadaha iyo ilaalinta shaqaalaha si loo xaqiijyo sharaf iyo horumar. Dowladda waxay sidoo kale iskaashi la yeelan doontaa jaaliyadda dibadda, iyadoo la raacayo siyaasadda Qurbajoogta, si loo dhiso bulsho firfircoon oo ay u xoojiyaan shaqaalaha socdaalaya, taasoo u suurto gelinaysa inay door muhiim ah ka qaataan horumarka qaranka. Intaa waxaa dheer, waxaa la aasaasi doonaa Nidaamka Maareynta Xogta Socdaalka Shaqaalaha (LMIS) si loo bixiyo xog hagta dooda siyaasadeed iyo dib-u-habaynta.

Muddada gaaban iyo tan degdegga ah, tallaabooyin kala duwan ayaa la qaadi doonaa, sida lagu xusay aragtida isbeddelka ee istiraatiijiyaddan. Tallaabooyinkan waxaa ka mid ah dhammeystirka sharciyada muhiimka ah iyo Heshiisyada Laba-geesoodka ah ee Shaqaalaha Socdaalaya (BLAs), isku-darka arrimaha muhiimka ah ee qorsheynta iyo hirgelinta (oo ay ku jiraan jinsiga iyo naafanimada, isbeddelka cimilada), iyo Xoojinta nidaamyada dib-u-soo laabashada iyo dib-u-dhexgelinta shaqaalaha socdaalaya si loo taageero kuwa gudaha dalka kusoo laabanaya

### Kormeerka, Qiimeynta, iyo Nidaamka Natijoooyinka

Dhammaan daneeyayaasha waxaa looga baahan yahay inay kormeeraan hawlaha lagu xusay siyaasaddan, iyadoo sanad walba warbixin ka bixinaya horumarka la gaaray. Horumarkan waxaa lagu cabbiri doonaa iyadoo la eegayo tilmaamayaasha waxqabadka ee la isla oggolaaday (KPIs).

Sahan hordhac ah (baseline survey) ayaa lagu samayn doonaa sannadka ugu horreeya ee hirgelinta siyaasadda si loo ururiyo xogta aasaasiga ah ee socdaalka shaqaalaha, taas oo lagu go'aamin doono bartilmaameedyada siyaasadda. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) waxay ururin doontaa xogta laga helay hay'adaha kala duwan, si loo diyaariyo warbixinta waxqabadka sanadlaha ah. Dhisidda nidaamka xogta suuqa shaqada (Labour Market Information System - LMIS) ayaa la filayaa inay bixiso xog cusub oo dhameystiran, taas oo hagaajinaysa nidaamka qiimeynta.

Dib-u-eegisyo waxqabad sanadeed ayaa la sameyn doonaa si loo cabbiro horumarka, waxaana warbixinnada lagu soo bandhigi doonaa shirarka Guddiga Isku-xirka Qaranka ee Socdaalka Shaqaalaha iyo Hannaanka Isku-xirka Qaranka (NCM). Tani waxay fursad u siin doontaa NCM inay qiimeyso waxtarka tilmaamayaasha iyo cabirrada loo adeegsaday qiimeynta horumarka.

## Kheyraadka(Kharashaadka) loo Baahan Yahay

Qiimaha la qiyaasay ee lagu hirgelinayo siyaasaddan sannadka ugu horreeya waa **\$10,053,000**.

Qiimaha la qiyaasay ee hirgelinta siyaasaddan sanadkeeda ugu horreeya waa **\$10,053,000** (Toban Milyan iyo Konton iyo Saddex Kun oo Doollar). Xisaabtanku wuxuu ku salaysan yahay miisaaniyadda loo qorsheeyay MoLSA ee hawlaha kala duwan, laguna xisaabiyay doollarka Mareykanka.

Sida ku cad baahida kharashka, sheyga ugu badan ee loo qoondeeyay kharashka shanta sano ee soo socota wuxuu noqon doonaa taageerada wada-hawlgalayaasha bulshada iyo xoojinta doorkooda ee isuduwid hay'adaha. Heer la mid ah maalgashi ayaa loo qoondeyn doonaa ilaalinta bulshada ee shaqaalaha socdaalka iyo qoysaskooda. Nidaaminta Shirkadaha Shaqaaleysiinta Gaarka ah, waa qaybta labaad ee qoondeynta kharashka ugu weyn, maadaama ay door muhiim ah ka ciyaarayaan habka socdaalka shaqo. Qaybaha muhiimka ah ee bixinta khayraadka ayaa loo qoondeeyay horumarinta xirfadaha, xoojinta xirfadaha, iyo guud ahaan maamulka socdaalka shaqaalaha si loo taageero Hannaanka Isku-xirka Qaranka ee Socdaalka (NCM).

## Khataraha La filan karo

Dagaalka sokeeye ee wali ka jira Soomaaliya wuxuu khatar weyn ku yahay hirgelinta **Siyaasadda Qaranka ee Socdaalka Shaqaalaha**. Waxaa la filayaa in dadaallada nabad-dhisidda ay sii socdaan tobanka sano ee soo socda, si loo abuurro jawi ku habboon oo fududeynaya socdaal shaqo oo sugan, nidaamsan, iyo sharciyeysan. Khataraha kale ee saameyn kara hirgelinta siyaasadda waxaa ka mid ah:

- Caqabadaha isku-dubaridka hay'adaha kala duwan ee la shaqeeya wada-hawlgalayaasha bulshada.
- Xog la'aanta la xiriirta socdaalka shaqaalaha, gaar ahaan xogta aan si fiican loo kala saarin (data disaggregation).
- Nidaam daciif ah oo la xiriira maamulka shaqaalaha, kaas oo leh isku-xirnaan yar ama aan jirin guud ahaan hay'adaha iyo daneeyayaasha muhiimka ah.


Hannaanka natiijooyinka waxaa lagu saleeyay qodobbo la filayo oo muhiim u ah hirgelinta siyaasadda, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- Ka qaybgal firfircoon iyo iskaashi joogto ah oo ay sameeyaan dhammaan daneeyayaasha heer qaran iyo heer dowlad-goboleed.
- Shirkadaha shaqaaleysiinta oo diyaar u ah inay u hoggaansamaan xeerar-nidaamyada la dejinayo.
- Taageero firfircoon iyo ka-qaybgalka wada-hawlgalayaasha bulshada iyo hay'adaha taageera.
- Helitaanka kheyraadka lagama maarmaanka ah iyo iskaashi la-hawlgalayaasha horumarineed.

## Muddada Hirgelinta (Time Frame)

Istiraatiijiyaddan waxaa la hirgelin doonaa muddo shan sano ah (2025-2030). Dib-u-eegis xilli-dhexe (mid-term review) ayaa la sameyn doonaa sannadka 2028, halka qiimeyn dhammaystiran la fulin doono sannadka 2030.

Inta lagu jiro muddada hirgelinta, Dowladda iyo hay'adaha fulinta waxay sii wadayaan dhaqangelinta maamulka socdaalka shaqaalaha iyo tallaabooyinka la xiriira, iyaga oo ku shaqeynaya hagidda Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) iyo Guddiga Isku-xirka Socdaalka Shaqaalaha.



# 1

## Hordhac

### 1.1. Sooyaal iyo Xaaladda (Background and Context)

Tirada dadka Soomaaliya ayaa lagu qiyaasaa inay gaarto qiyaastii 18.7 milyan oo qof, iyadoo dhaqaaluhu uu ku tiirsan yahay adeegyo (sida ganacsiga), beeraha iyo kalluumeysiga. Inta badan dadka waxay ku nool yihiin qaybta Nolal Maalmeedka, iyadoo beeraha ay ka qayb qaataan 80.3% GDP-ga guud ee dalka. Sannadkii 2023, GDP-ga Soomaaliya wuxuu ahaa \$10.42 bilyan, iyadoo GDP-ga sanadkiiba ee qofka uu yahay \$592. Heerka kororka GDP-ga ee dalka waa 2.43%, waxaana la filayaa inuu kordho ilaa 3.5% sanadka 2024 iyo 3.8% sanadka 2025, taasoo ka sarreysa heerka kororka tirada dadka ee qiyaastii 2.43%. In kasta oo ay jiraan saadaalinta kororka, Soomaaliya waxay wajahayaan caqabado dhaqaale oo waaweyn, oo ay ka mid yihiin uruurinta dakhliga gudaha oo hooseysa iyo heerarka faqriga oo sarreeya, kuwaas oo ka sii daraya amni darro. Dadaallada lagu soo jiidanayo maalgelinta tooska ah ee shisheeye (FDI) iyo dhiirrigelinta dhaqaalaha gaarka ah ayaa muhiim u ah horumarinta dhaqaalaha Soomaaliya, abuurista fursado shaqo iyo dhimista heerarka faqriga ee hadda jira.

#### 1.1.1. Socdaalka iyo Isbeddelada La Xiriira ee Soomaaliya

Soomaaliya waa dal leh dhaqdhaqaaqyo socdaal oo kala duwan, waxana ay u adeegtaa sida waddan asal ah (origin), waddan loo socdaalo (destination), iyo waddan maris ah (transit country) oo ay soo maraan dad ka kala taga Geeska Afrika iyo meelo kale oo caalamka ah.

Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee Soomaaliya ay wajahdo waa abuurista shaqo iyo fursado shaqo oo ku filan bulshada. Heerka shaqo la'aanta dalka wuxuu yahay 19.29%, taas oo sii adkeynaysa helitaanka shaqo. Faqrigu weli waa mid baahsan, iyadoo in ka badan 60% bulshada ay ku noolyihiin wax ka yar \$1.90 maalintii. Heerka wax-akhris-qoris ee Soomaaliya wuxuu yahay 41.03%, taasoo muujinaysa baahida loo qabo in la xoojiyo waxbarashada si loo hagaajiyo fursadaha shaqo. Waxaa jira farqi weyn oo

u dhexeeya ragga iyo dumarka ka qeybqaata suuqa shaqada. Kaliya 33% ragga iyo 12% dumarka ayaa si firfircoon uga shaqeeya. Dowladda Soomaaliya, iyada oo loo marayo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA), waxay la shaqeynaysaa hay'adaha horumarinta si loo xoojiyo dhismaha hay'adaha, loona abuuro xasillooni dhaqaale oo horseedi karta korriin, yareynta faqriga, iyo ka bixitaanka xaaladda jilicsanaanta.

Soomaaliya waxay leedahay bulsho da' yar oo haddii si wanaagsan loo maareeyo, wax badan ka tari karta horumarinta dhaqaalaha. Si kastaba ha ahaatee, heerka shaqo la'aanta dhallinyarada, gaar ahaan kuwa waxbartay, waa mid sareeya. Dhallinyarada leh xirfadaha qiimaha leh waxay u badan yihiin inay ka haajiraan dalka si ay u raadsadaan fursado shaqo oo ka wanaagsan.

### 1.1.2. Qaxooti iyo Codsiyada Magangalyada

Sida ku cad xogta UNHCR ee April 2023, Soomaaliya waxaa ku sugan 685,198 oo qaxooti Soomaaliyeed, iyadoo inta badan ay ku sugan yihiin dalalka deriska ah, gaar ahaan Kenya (301,526) iyo Itoobiya (253,616). Sannadkii 2020, Soomaaliya waxay martigelisay 35,461 qaxooti iyo codsiyo magangalyad, inta badan waxay ka yimaadeen Itoobiya (23,701). Soomaaliya sidoo kale waxay leedahay bulsho weyn oo qurbojoog ah, oo lagu qiyaasayo 1-1.5 milyan oo qof, kuwaasoo si weyn ugu sugan Boqortooyada Ingiriiska, Netherlands, Norway, Sweden, Maraykanka, Kanada, iyo Australia (FMPT, 2022).

### 1.1.3. Socdaalka Gudaha iyo Soo-galootiga (Inbound Migration)

Marka laga eego socdaalka gudaha, sida ku cad warbixinta UNHCR ee Shabakadda Ilaalinta iyo Kormeerka Soo-noqoshada (PRMN), waxaa jira in ka badan 1.2 milyan oo qof oo gudaha Soomaaliya ku barakacay sanadka 2023. Warbixintii 2021 ee Diiwaangelinta Socdaalka ee IOM (DTM) ee Soomaaliya ayaa muujisay 121,671 dhaqdhaqaaq gudaha Soomaaliya, halka 66% ka yimid Itoobiya, 13% ka yimid Kenya, iyo 10% ka yimid Jabuuti. Warbixintii isla sanadkii ayaa sidoo kale muujisay 159,812 dhaqdhaqaaq oo ka baxay Soomaaliya sannadkii 2020. Dalalka ugu badan ee loo safray waxaa ka mid ahaa Itoobiya (46%), Sacuudiga (23%), Yemen (15%), Kenya (11%) iyo Jabuuti (6%). Sida ay sheegtay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA), in ka badan 15,000 rukhsad shaqo ayaa la siiyay Soomaaliya labada sano ee la soo dhaafay. Shaqaalahaasi waxay badankood ka yimaadeen dalalka Uganda, Kenya, Hindiya, Boqortooyada Ingiriiska, Pakistan, iyo Bangladesh.

### 1.1.4. Socdaalka Dibedda

Waddooyinka caadiga ah ee socdaalka Soomaaliya waxaa ka mid ah: (i) ka gudubka badda ee Yemen (oo noqotay mid aan caan ahayn tan iyo 2015 sababo la xiriira dagaalka Yemen) iyo socdaalka loo sii marayo dalalka Khaliijka; (ii) socdaalka koonfureed ee Soomaaliya iyadoo loo sii marayo Kenya ilaa Koonfur Afrika; iyo (iii) socdaalka galbeed ee loo marayo Suudaan iyo Liibiya, iyadoo ujeedadu tahay in la maraa Badda Mediterranean si loo gaaro Yurub. Xog cusub oo la xiriirta tahriibka sharci-darrada ah lama hayo. Si kastaba ha ahaatee, Soomaaliya waxay dhammeystirtay Heshiiska Laba-geesoodka ah ee Shaqaalaha (BLA) la leh Qatar, waxayna hadda soo gabagabeyneysaa BLA la leh Boqortooyada Sacuudi Carabiya, oo ah waddanka martigeliya inta badan shaqaalaha Soomaaliyeed ee dibadda, gaar ahaan haweenka.

### 1.1.5. Ka-qaybgalka Jaaliyadda Soomaaliyeed (Diaspora Engagement)

Jaaliyadda Soomaaliyeed ee qurbo-joogta Soomaaliya waxaa lagu qiyaasaa inay ka kooban tahay 2 milyan oo Soomaali ah oo ku sugan Boqortooyada Ingiriiska, Netherlands, Norway, Sweden, Maraykanka, Kanada, Koonfur Afrika, iyo Australia (FMPT, 2020).

### 1.1.6. Lacagaha Ay Dibadda Ka Soo Direen Jaaliyadda Soomaaliyeed (Remittances)

Lacagaha ay dibadda ka soo diraan jaaliyadda Soomaaliyeed waxay door muhiim ah ka ciyaaraan kobaca dhaqaalaha dalka. Lacagaha xawaaladaha la soo mariyo waxay udub-dhexaad u yihiin dhaqaalaha Soomaaliya, waxaana la qiyaasayaa in sannadihii 2023 iyo 2024 ay gaarayaan inta u dhexeysa \$1.73 bilyan ilaa \$2 bilyan. Lacagtani waxay ka badan tahay guud ahaan dakhligii soo baxay ee Soomaaliya ay ka heshay dhoofinta badeecadaha sanadlaha ah.

### 1.1.7. Sababaha Socdaalka

Soomaaliya waxay weli tahay dalka soo-galitaanka, marinka, iyo goobta loogu socdo ee qulqulatooyinka socdaalka aan sharciyeysneyn. Socdaalka noocan ah waxaa keena arrimahan:

1. La'aanta fursado dhaqaale oo waara ee dhalinyarada 60% dadweynaha Soomaaliyeed waxay ka yar yihiin 25 sano jir (sida la xusay 2020), waxaana la daalaa-dhacayaan fursado shaqo oo xaddidan. Tani waxay dhalinyarada ku khasbeysaa inay u socdaalaan dibadda si ay u helaan nolol ka wanaagsan.
2. Dagaal, amni-darro, iyo arrimo deegaanka la xiriira: Dagaalada sokeeye, amni-darrada, iyo masiibooyinka dabiiciga ah sida fatahaadaha, abaaraha, saboolnimada, iyo macaluusha ayaa sii kordhiya barakaca gudaha, iyagoo yareynaya fursadaha shaqo ee dalka gudahiisa.
3. Socdaalka aan sharciyeysneyn: Soomaalida waxay u safraan saddex waddo oo waaweyn: i. Badda u gudubka Yemen (iyo halkaas oo ay uga sii gudbaan dalalka Khaliijka). ii. Koonfurta oo ay ka maraan Kenya una sii socdaan Koonfur Afrika si ay uga helaan nolol wanaagsan. iii. Galbeedka oo ay u safraan Libya iyagoo damacsan inay ka tallaabaan Badda Mediterranean-ka si ay u gaaraan Yurub.

Waxaa jira laba nooc oo waaweyn oo socdaal ah: Socdaalka Ikhtiyaariga ah (Voluntary Migration) iyo Socdaalka Qasabka ah (Forced Migration).

#### Socdaal Ikhtiyaari ah (Voluntary Migration)

Socdaalka ikhtiyaariga ah wuxuu dhacaa marka qofku si iskiis ah u doorto inuu ka tago hoygiisa si uu ugu guuro meelo kale, gudaha dalka (socdaalka gudaha) ama dibaddiisa (socdaalka caalamiga ah), iyada oo ujeeddadu tahay helidda nolol dhaanta. Sida lagu sheegay warbixinta Dhaqdhaqaaqyada Xuduudaha ee IOM (Cross Border Movements Report, Oktoobar 2023), heerka socdaalka ikhtiyaariga ah ee Soomaaliya wuxuu gaarayaa 44%. Sababaha ugu waaweyn ee keena socdaalka ikhtiyaariga ah ee Soomaaliya: Sababaha dhaqaale (26%) – Dadka oo shaqooyin iyo nolol dhaanta raadinaya. Socdaalka xilliga xilliga beeralayda (9%) – Gaar ahaan xoolo-dhaqato iyo dad beeraley ah oo u hayaama meelaha cimiladoodu wanaagsan tahay si ay ugu guuraan ama wax u beertaan. Sababaha qoyska la xiriira (3%) – Dadka oo u guura meelaha ehelkoodu ku nool yahay. Dib-u-soo noqoshada (2%) – Dad hore u socdaalay oo kusoo laabanaya dalkooda hooyo. Sababo kale (4%) – Sababo aan si gaar ah loo qeexin.

#### Socdaalka Qasabka ah (Forced Migration)

Socdaalka qasabka ah wuxuu tilmaamayaa dhaqdhaqaaqyada socdaalka ee lagu qasbo dadka, taasoo ka dhalata sababo ay ka mid yihiin: Dhibaatada lagu qasbo inay ka baxaan deegaankooda (force, expulsion). Dhibaatooyinka dabiiciga ah sida abaaraha iyo fatahaadaha. Dagaal, amni-darro, iyo cunno yaraan.

Sida laga soo xigtay xogta, socdaalka qasabka ah wuxuu ka dhigan yahay 53% dhammaan socdaalka Soomaaliya.

Sababaha keena socdaalka qasabka ah ee Soomaaliya: 31% barakacayaal ay sababtay musiibooyin dabiici ah (fatahaado, abaaro, iwm.). 20% barakacayaal ay sababtay cunno la'aan (food insecurity). 2% barakacayaal ay sababtay colaado iyo amni-darro. Qaybaha hoos ku xusan waxay baarayaan laba arrimood oo waaweyn oo ku saabsan socdaalka khasabka ah:

**1. Qaxootiga, Barakacayaasha Gudaha, iyo Dib-u-soo laabtayasha (IDPs, Refugees & Returnees):**

Sida laga soo xigtay Xogta UNHCR Operations Data Portal (5 Febraayo 2024), Soomaaliya waxay leedahay:

- ▶ 2,788,453 qof oo la qiyaasay inay yihiin barakacayaal gudaha ah (Internally Displaced Persons - IDPs).
- ▶ 17,957 qaxooti oo ku nool dalal kale.
- ▶ 20,506 magangalyo-doon ah (Asylum Seekers).
- ▶ 93,721 qof oo dib ugu soo laabtay Soomaaliya laga bilaabo Janaayo 2024.

**2. Socdaalka ka dhashay Isbeddelka Cimilada (Migration as a Result of Climate Change)**

Sanadka 2024, Soomaaliya waxay diiwaan-gelisay 13,000 qof oo cusub oo barakacay sababo la xiriira:Colaad.Fatahaado. Abaaro iyo xaalado kale oo la xiriira isbeddelka cimilada.

Tani waxay muujinaysaa in isbeddelka cimiladu door weyn ka ciyaaro barakaca dadka Soomaaliyeed, taasoo xoojineysa baahida loo qabo xalka waara ee lagu yarayn karo saameynta ay dhibaatooyinkaas ku leeyihiin bulshada.

► **Jadwalka 1: Sababaha Socdaalka**

Nooca Socdaalka	Sababta Socdaalka	Boqolleed
<b>Nooca Socdaalka</b>	Sababaha Dhaqaale	26%
	Socdaalka Xilliga Xilliyeed	9%
	Sababaha Qoyska	3%
	Dib-u-soo laabasho	2%
	Sababo Kale	4%
<b>Wadarta Guud</b>		44%
<b>Socdaal Qasab ah</b>	Dagaal iyo Amni-darro	2%
	Musiibooyinka Dabiiciga ah	31%
	Cunto-yaraan	20%
<b>Wadarta Guud</b>		53%
<b>Si Kale</b>	Noocyada kale ee socdaalka	3%

**Ilaaha Xogta:** IOM (2023) Socdaalka Xuduudaha La Gudbo (Cross Border Movements)

**1.1.8. Qurba Joogta Soomaaliyeed (Somalia's Diaspora)**


Sida lagu xusay Siyaasadda Qurba Joogta Soomaaliyeed, waxaa lagu qiyaasaa in jaaliyadda Soomaaliyeed ee dibadda ay ka badan tahay **2 milyan** qof. Siyaasaddan waxay muujineysaa in "Dadaallada Dowladda ee mideynta iyo abaabulka Shabakadaha Jaaliyadda Soomaaliyeed ay fursad u yihiin xoojinta qaranka iyo adkeynta adkeysigiisa" (Bogga 9).Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Soomaaliya (NDP 2020-24) sidoo kale wuxuu aqoonsaday doorka muhiimka ah ee jaaliyaddu ka ciyaari karto horumarinta dalka. Waaxda Arrimaha Jaaliyadda, oo hoos timaadda Wasaaradda Arrimaha Dibadda, ayaa mas'uul ka ah hirgelinta barnaamijyada lagu fulinayo Siyaasadda Qaranka ee Jaaliyadda.

Qodobada Muhiimka ah ee Diiradda la Saarayo: Socdaalka iyo Horumarinta Dhaqaalaha

Siyaasaddan waxay xoogga saartaa xiriirka u dhexeeya socdaalka iyo kobaca dhaqaalaha, iyadoo jaaliyadda Soomaaliyeed ay door muhiim ah ka ciyaarto horumarinta dalka, gaar ahaan dhinacyada soo socda:

1. Lacagaha Xawaaladaha (Remittances) – Lacagaha ay jaaliyadda Soomaaliyeed dibadda ka soo diraan waxaa lagu qiyaasayaa inta u dhexeysa \$1.73 bilyan ilaa \$2 bilyan sanadihii 2023 iyo 2024.
2. Horumarinta Awoodaha Aadanaha (Human Capital Development) – Jaaliyaddu waxay gacan ka geysataa horumarinta xirfadaha iyo aqoonta dalka.
3. Xoojinta Xirfadaha (Skills Strengthening) – Jaaliyaddu waxay la wadaagtaa dalka hal-abuur cusub iyo hab-dhaqanno wanaagsan.
4. Isdhaafsiga Dhaqanka iyo Kala-duwanaanta (Cultural Exchanges and Diversity) – Waxay dhiirrigelisaa is-dhaafsiga dhaqamada iyo is-fahamka bulshooyinka kala duwan.
5. Xoojinta Awoodaha Hay'adaha (Institutional Capacity Building) – Waxay taageertaa xoojinta hay'adaha dowliga ah iyada oo la wadaagayo waayo-aragnimo iyo hab-dhaqan wanaagsan.

### Khariidadan waxay muujineysaa dadka Soomaaliyeed ee ku nool:



khariiradda Jabuuti iyo , Soomaliya iyo Tirada Dadka ee Dalalka

■ + 1,000,000 ■ + 100,000 ■ + 10,000 ■ + 1,000

### Caqabadaha Ay La Kulmaan Shacabka Soomaaliyeed ee Qurbo-joogta

Sida ay sheegtay Siyaasadda Qurbo-joogta Qaranka, Soomaalida ku nool qurbo-joogta waxay la kulmaan caqabado dhowr ah, oo ay ka mid yihiin:

1. Isku-dubbarid iyo wada shaqayn kooban: Isku-dubbarid la'aanta iyo wada shaqayn la'aanta qurba-joogta, dawladda iyo ganacsiga gaarka ah ee Soomaaliya ayaa meesha ka saaray kalsoonidii lagu qabay xaaladaha qaarkood.
2. Xaaladaha Shaqo ee Aan Ku Habboonayn: Soomaalida ku nool qurbo-joogta waxay la kulmaan xaalado shaqo oo aan ku habboonayn dalalka martigelinta, kuwaasoo sii xumaanaya marka loo eego kharashaadka nolasha oo sareeya, canshuuraha, luqadda, cimilada iyo caqabado kale oo dhaqan. Qurbo-joogtu ma helaan xog ku filan oo ku saabsan horumarka ka socda gudaha dalka.

Warbaahinta xaddidan ee ay ku tiirsan yihiin ma bixiso macluumaad dhameystiran oo ay ku xisaabtami karaan. Ma jiraan barnaamijyo iyo qorshayaal si rasmi ah loogu diyaariyay dib-u-soo laabashada iyo dib-u-dhexgalka qurbo-joogta.

3. Daldaloolo Dastuurka iyo Xeerarka oo Laga Maarmaan yahay: Wax ka beddelka Dastuurka 2012 iyo sharciyada muhiimka ah ayaa loo baahan yahay si loo hago maamulka qurbo-joogta.

**Dadaallada Dowladda:** Si looga jawaabo caqabadahan, dowladda ayaa hirgelinaysa tallaabooyinka soo socda:

1. Nidaamyada Isku-xirnaanta Dhexe: In la dhiso nidaam isku-xirnaan dhexe oo lagu soo dhoweynayo qurbo-joogta, oo ay ku jirto madal dhexe iyo xog-ururin muhiim ah oo lagama maarmaan u ah hagista fursadaha isku-xirnaanta iyo maalgelinta qurbo-joogta ee Soomaaliya.
2. Xoojinta Adeegyada Qunsuliyadda: Hagaajinta adeegyada qunsuliyadeed ee safaaradaha, wakiilada iyo qunsuliyada, gaar ahaan dalalka ay ku nool yihiin bulshada Soomaaliyeed ee ballaaran.
3. Wadaagista Xogta: Wadaagista xogta ku saabsan horumarka iyo fursadaha maalgelinta ee Soomaaliya iyo qeybo kala duwan oo ka mid ah dhaqaalaha dalka.
4. Taageerada Shabakadaha Qurbo-joogta: Taageeridda shabakadaha qurbo-joogta iyo ururrada si ay u abaabulaan una fuliyaan mashaariicda loogu talagalay gudbinta aqoonta iyo xirfadaha, gaar ahaan dhallinyarada.
5. Xiriirinta Shaqada Dowladda ee (Migration for Development in Africa MIDA): Xiriirinta shaqada ay dowladda ka waddo Barnaamijka Socdaalka ee Horumarinta Afrika (MIDA) oo tan iyo 2008 bixiya tababaro xirfadlayaasha qurbo-joogta.

### 1.1.9. Falanqaynta (Awoodaha, Fursadaha, Daciifnimada, iyo Khataraha) SWOT


Muuqaalka socdaalka shaqaalaha ee Soomaaliya waxaa lagu sharxay qaybtaan iyadoo la adeegsanayo falanqaynta SWOT (Awoodaha, Daciifnimada, Fursadaha iyo Khatarta), taas oo muujineysa awoodaha hadda jira iyo caqabadaha iyo xaddidaadaha weli taagan. Qaabkan waxa uu u adeegayaa sida tixraac qorsheynta istaraatiijiyadda, geedi socodka go'aan qaadashada, iyo maamulka guud ee nidaamka socdaalka shaqaalaha Soomaaliya qaababka soo socda:

1. Awoodaha: Dhacdooyinka, mansabyada, iyo sifooyinka xoogga leh ee siinaya Soomaaliya faa'iido tartan iyo aasaas u ah socdaalka shaqada mustaqbalka.
2. Fursadaha: Fursaduhu waxay tixraacaan awoodaha, arrimaha deegaanka, iyo fursadaha bixiya rajo mustaqbalka wanaagsan ee suuqa shaqada, taas oo laga faa'iidayso karo.
3. Daciifnimo: Daciifooyinku waxa ay ka kooban yihiin guul-darrooyinka, caqabadaha iyo khasaaraha kuwaas oo weli caqabad ku ah sii wadida goobta horumarinta ee socdaalka shaqada ee Soomaaliya.
4. Khataraha: khataraha waa arrimo gudaha iyo dibadda ah oo caqabad ku noqon kara rajada horumarineed ee Soomaaliya, oo inta badan ka baxsan awoodda dalka.


Falanqaynta SWOT waxay kala saartaa arrimaha gudaha iyo dibadda. Awoodaha iyo daciifnimada waa dhinacyo gudaha ah oo ay Soomaaliya gacanta ku hayso. Fursaduhu waxay noqon karaan kuwo gudaha iyo dibadda ah labadaba waana laga faa'iidayso karaan. Khataraha, si kastaba ha ahaatee, ayaa ugu horrayn arrimo dibadeed ah, kuwaas oo qaarkood ay yihiin kuwo ka baxsan awoodda Soomaaliya, balse uu waddanku qaadi karo tallaabooyin sharci iyo doorashooyin siyaasadeed.

► **Falanqaynta (Awoodaha, Daciifnimada, Fursadaha, iyo Caqabadaha SWOT) ee Nidaamka Socdaalka Shaqaalaha ee Soomaaliya**

Awoodaha (Strengths)	Daciifka ah (Weaknesses)
<p>Soomaaliya waxay muujisay rabitaan siyaasadeed oo xooggan heerka ugu sareeya ee dowladda, iyadoo aqoonsanaysa muhiimada socdaalka shaqaalaha iyo maamulka socdaalka. Qaab-dhismeedyo iyo hay'ado muhiim ah waxaa ka mid ah:</p> <p>Qaab-dhismeed sharci, siyaasadeed, iyo hay'adeed oo maamula socdaalka shaqaalaha. Xeerka Shaqada oo ku jira baarlamaanka sanadka 2024.</p> <p>Heshiisyada ILO ee la saxiixay iyo la ansixiyay, kuwaas oo saldhig u ah xoojinta qaab-dhismeedka sharci iyo siyaasadeed.</p> <p>Heshiisyada Laba-geesoodka ah ee Shaqaalaha (BLA) ee dalalka martigelinaya shaqaalaha socdaalka Soomaaliyeed.</p> <p>Siyaasadda Qurbo-joogta ee Qaranka (2013).</p> <p>Bayaanka Qaranka ee Xalka Joogtada ah ee Qaxootiga Soomaaliyeed iyo Soo-noqoshadooda Soomaaliya.</p> <p>Hay'adaha la aasaasay oo ka shaqeeya arrimo kala duwan oo la xiriira socdaalka shaqaalaha, waxaa ka mid ah:</p> <p>Guddigga Qaranka ee Qaxootiga iyo Barakacayaasha Waaxda Arrimaha Qurbo-joogta</p> <p>Xafiiska Wakiilka Gaarka ah ee Xuquuqda Carruurta iyo Shaqaalaha Socdaalka</p> <p>Kooxaha Shaqada iyo Kooxaha Farsamada ee maamulka socdaalka shaqaalaha, shirkada shaqaaleysiinta iyo hab-maamuusyada isku-xirka si loo taageero socdaalka shaqaalaha</p> <p>Soomaaliya waxay ka faa'iidayneysaa nidaamka lacagaha lacag-u-qaadista ee waxtarka leh, taasoo u suurtagelinaysa lacagaha loo soo diro si dhaqso ah oo ka yimaada dibedda.</p> <p>Dadka Soomaaliyeed waxay muujiyeen adkeysiga iyo la qabsiga cajiib ah, waxayna ku guuleysteen inay ku noolaadaan xaalado iyo qeybo kala duwan oo ka mid ah dalalka martigelinta.</p>	<p>Caqabadaha isku-xirnaanta ee jira hay'adaha qaar ee ka shaqeynaya wada-hawlgalayaasha bulshada.</p> <p><b>Maxaa la sameynayaa?</b> Si arrintan loo xalliyo, dowladda ayaa dib u habeyn ku sameyneysa Kooxaha Shaqada Farsamada iyo xub-nahooda si loo xoojiyo xiriirka shaqo ee ka dhaxeeya kooxaha iyo hay'adaha hadda jira. Socdaalka shaqaalaha Soomaaliya waxaa lagu gartaa xog xaddidan iyo kala soocid la'aan.</p> <p><b>Maxaa la sameynayaa?</b> Jawaab ahaan, dowladda ayaa sameysay Sahan Awoodda Shaqada ee 2019 iyo waxay horumarinaysaa Nidaamka Macluumaadka Suuqa Shaqada si loo bixiyo xogta shaqada.</p> <p>Maamulidda shaqada Soomaaliya waa daciif, iyadoo ay jirto isku-xirnaan xaddidan oo u dhaxeysa daneeyayaasha muhiimka ah.</p> <p><b>Maxaa la sameynayaa?</b> Si loo xoojiyo qaab-dhismeedkan, dowladda ayaa horumarinaysa siyaasado iyo xeerar qaran oo isku-dhafan iyo waaxaha baarlamaanka ee ay ka qayb qaataan daneeyayaal badan.</p> <p>Barnaamijyada iyo khayraadka lagu taageerayo shaqaalaha socdaalka gudaha iyo dibedda waa xaddidan. Caqabadahani waxaa ka mid ah tababarka kooban ee shaqaalaha socdaalka, tababarada kooban ee shaqaalaha socdaalka, taageero xaddidan oo la siiyo shirkadaha shaqaaleysiinta iyo kiisaska ku saabsan xadgudubyada xuquuqda iyo khaladaadka.</p> <p><b>Maxaa la sameynayaa?</b> Dowladda ayaa dejineysa siyaasado iyo xeerar, oo ay ku jiraan kuwa PEAs, si ay u taageerto shaqaalaha socdaalka. Hay'ado kala duwan ayaa bixiya tababarada kooban ee shaqaalaha socdaalka, inkasta oo ay yihiin kuwo ku kooban oo xaddidan. Intaa waxaa dheer, dadaallo ayaa socda oo la sameynayo oo ay wada shaqeynayaan Wasaaradda Haweenka si loo soo bandhigo baaritaanka galmada ee ka hor bixitaanka.</p>



Fursadaha (Opportunities)	Khataraha
<p><b>Iskaashiga Goboleed iyo Caalami (Regional and International Partnerships)</b></p> <p>Ururrada goboleed ee COMESA, EAC, iyo IGAD waxay bixiyeen taageero muhiim ah si loo hubiyo socdaal badbaado leh, nidaamsan, oo sharciyeysan. Taageeradan waxay muuqataa iyada oo loo marayo: Hirgelinta Hannaanka Khartoum (Khartoum Process) – Nidaam iskaashi oo wax looga qabanayo socdaalka shaqaalaha iyo tahriibka. Fulinta Baaqii Nairobi (Nairobi Declaration) – Heshiis goboleed oo lagu xoojinayo xalalka waara ee la xiriira qaxootiga iyo dib-u-dhexgalka shaqaalaha socdaalaya.</p> <p><b>La-hawlgalayaasha Horumarinta (Development Partners)</b></p> <p>Hay'ado badan oo horumarineed ayaa si joogto ah Soomaaliya uga taageeraya <b>maaraynta arrimaha socdaalka shaqaalaha</b>, kuwaas oo ay ka mid yihiin: <b>ILO</b> (International Labour Organization) – Horumarinta siyaasadaha shaqaalaha iyo ilaalinta xuquuqda shaqaalaha socdaalaya. <b>IOM</b> (International Organization for Migration) – Taageeridda nidaamka socdaalka iyo dib-u-dhexgalka. <b>UNHCR</b> (United Nations High Commissioner for Refugees) – Taageeridda qaxootiga iyo magangelyo-doonka. <b>EU</b> (European Union) – Maalgelinta mashaariicda socdaalka iyo nidaamka shaqaalaha. <b>Bangiga Adduunka (World Bank)</b> – ah siiyeen Soomaaliya si wax looga qabto arrimaha socdaalka.</p> <p><b>Shabakadaha iyo Ururada Qurba Joogta Soomaaliyeed (Diaspora Networks and Associations)</b></p> <p>Sanadihii la soo dhaafay, bulshada qurba-joogta Soomaaliyeed waxay samaysteen shabakado iyo ururro qurba-joog ah si ay u kabaan dadaallada maareynta socdaalka shaqada.</p>	<p><b>Xasilooni-darro Siyaasadeed iyo Colaado</b></p> <p>Xasilooni-darrada siyaasadeed iyo colaadaha Soomaaliya iyo dalalka deriska ah waxay u badan tahay inay sii xumeeyaan xaaladaha bini'aadamnimada, barakac gudaha, iyo socdaalka shaqo ee sii socda.</p> <p><b>Isbeddelka Cimilada</b></p> <p>Isbeddelka cimilada ayaa la filayaa inuu sii xumaado, taasoo keeni doonta xaalado cimilada aan la saadaalin karin. Iyadoo la tixgelinayo daciifnimada nidaamyada digniinta hore, khatartani waxay u badan tahay inay muujiso sida amni-darro cuntada, taasoo keeni karta socdaal dibedda. Soomaalida ayaa u badan inay u safraan dalal bixiya fursado nololeed iyo shaqo oo ka wanaagsan.</p>





# 2

## Ku saabsan siyaasadda qaranka ee socdaalka shaqalaha

---

Siyaasadda Qaranka ee Socdaalka Shaqaalaha waxay ujeedadeedu tahay in la dhiso nidaam ilaalinaya oo awood siinaya shaqaalaha socdaalaya, iyada oo la xoojinayo doorkooda horumarinta qaran ee Soomaaliya. Qaybaha Asaasiga ah ee Siyaasadda:

**Himilooyinka:** Dhisidda nidaam socdaal shaqo oo waara, isku-dhufan, xoojinaya sinnaanta jinsiga, kuna salaysan xuquuqda shaqaalaha, si loo gaaro horumar qaran.

**Hiigsiga:** Dhisidda qaab-dhismeed dhameystiran oo cadaalad ah, kaas oo fududeynaya socdaalka shaqo ee badbaado leh, nidaamsan, iyo sharciyeysan.

**Ujeeddada:** Ka faa'iidsiga ugu badan ee shaqaalaha gudaha iyo dibadda u socdaalaya si loo gaaro horumar iyo barwaaqo.

Mabaadi'da Asaasiga ah iyo Qiyamka Hagaya Siyaasadda

Siyaasaddan waxa ay ku salaysan tahay qiyamka iyo mabaadi'da soo socda:

1. Maamul-wanaagga (Good Governance)
2. Shaqo Sharafta Leh (Decent Work)
3. Awood-siinta, Ka-qaybgalka iyo Is-dhexgalka (Empowerment, Inclusion, and Participation)
4. Ilaalinta Bulshada, Caddaaladda Bulshada, iyo Wadahadalka Bulshada (Social Protection, Social Justice, and Social Dialogue)
5. Daahfurnaan iyo Isla-xisaabtan (Transparency and Accountability)
6. Horumar Waara (Sustainable Development)

## Ujeeddooyinka Istiraatiijiga ah ee Siyaasadda (Policy Strategic Objectives)

Siyaasaddan waxay leedahay ujeeddooyin istiraatiijiga ah oo ay ka mid yihiin:

1. Xoojinta maamulka socdaalka shaqalaha, iyada oo la waafajinayo xeerarka iyo habraacyada caalamiga ah ee shaqada.
2. Horumarinta xirfadaha shaqalaha iyo shahaado-siintooda, si loo aqoonsado shaqalaha Soomaaliyeed ee suuqyada shaqo ee caalamiga ah.
3. Xoojinta nidaamka ilaalinta bulshada iyo sugnaanta amniga bulsho ee shaqalaha socdaalaya.
4. Xoojinta doorka wada-hawlgalayaasha bulshada (Social Partners) ee la xiriira nidaamka shaqada.
5. Horumarinta ururinta, maaraynta, iyo faafinta xogta la xiriirta socdaalka shaqalaha.
6. Sharciyeynta iyo nidaaminta Shirkadaha Shaqaaleysiinta Gaarka ah (Private Employment Agencies ).
7. Dhisidda nidaam taageeraya dib-u-soo laabashada iyo dib-u-dhexgalka shaqalaha Soomaaliyeed ee dalka kusoo laabanaya.
8. Kor-u-qaadista doorka jaaliyadda Soomaaliyeed ee dibadda si ay uga qaybqaataan horumarinta dalka.

# ▶ 3

## Qeybaha muhiimka ah ee hirgelinta (Priority areas for implementation)

---

Qaab-dhismeedka Siyaasadda Qaranka ee Socdaalka Shaqaalaha wuxuu diiradda saarayaa fulinta tallaabooyin muhiim ah oo hoos yimaada siddeed aag siyaasadeed oo muhiim ah, kuwaas oo lagu faahfaahinayo sida soo socota:

### **Qeybaha 1: Xoojinta Maamulka Socdaalka Shaqaalaha si loo Waafajiyo Xeerarka iyo Heerarka Caalamiga ah (Strengthening Labour Migration Governance to align with International Labour Standards and Norms)**

Tallaabooyinka muhiimka ah ee la qaadayo waxaa ka mid ah:

1. Xoojinta Nidaamka Isku-xirka Qaranka (National Coordination Mechanism - NCM) ee hoos yimaada Xafiiska Madaxweynaha, si loo mideeyo hay'adaha fulinaya siyaasaddan ilaa heer dowlad-goboleed.
2. Bilaabidda, wadahadalka, xoojinta iyo dib-u-eegista Heshiisyada Laba-geesoodka iyo Multilateral-ka ee Socdaalka Shaqaalaha (Bilateral and Multilateral Labour Migration Agreements - BLMAs & MLMAs) la leh dalalka martigeliya shaqaalaha Soomaaliyeed.
3. Saxiixidda, dhaqan-gelinta, hirgelinta iyo dabagalka fulinta xeerarka shaqada ee caalamiga ah, oo ay ku jiraan heshiisyada, habraacyada, iyo ballanqaadyada la xiriira socdaalka shaqaalaha.

## **Qeybaha 2: Horumarinta Xirfadaha iyo Aqoonsiga Shaqaalaha (Promoting Skills Development and Recognition)**

Tallaabooyinka muhiimka ah ee la qaadayo waxaa ka mid ah:

1. Dhisidda nidaam qaran oo lagu diiwaangaliyo xirfadaha shaqaalaha iyo qorsheynta shaqo-abuurka.
2. Samaynta iyo hirgelinta nidaamyo shaqo-is-weydaarsi (labour mobility schemes) oo la jaan-qaadaya baahida suuqa shaqada iyo horumarinta xirfadaha Soomaaliya.
3. Maalgelinta barnaamijyada lagu horumarinayo xirfadaha shaqaalaha (skilling), lagu sare u qaadayo (up-skilling), iyo dib-u-tababarka (re-skilling) shaqaalaha socdaalaya gudaha iyo dibadda.
4. Abuurista goobo internet-ka ah (job portals) heer federaal iyo heer dowlad-goboleed si loogu xayeysiyo fursadaha shaqo iyo xirfadaha loo baahan yahay, lana isku xiro shaqo-bixiyeyaasha iyo shaqo-doonka gudaha iyo dibadda.
5. Taageeridda is-dhaafsigu aqoonta iyo xirfadaha ee shaqaalaha socdaalaya gudaha iyo dibadda.
6. Dhisidda hab-raacyo lagu xoojiyo helitaanka macluumaadka, waxbarashada, iyo tababarka shaqaalaha socdaalaya iyo qoysaskooda.

## **Qeybaha 3: Ballaarinta Ilaalinta Shaqada iyo Bulshada ee Shaqaalaha Socdaalaya iyo Qoysaskooda (Extending Labour and Social Protection to Migrant Workers and Their Families)**

Tallaabooyinka muhiimka ah ee la qaadayo waxaa ka mid ah:

1. Dib-u-eegista siyaasadaha iyo sharciyada ilaalinta bulshada, si loogu daro shaqaalaha socdaalaya, iyada oo la raacayo mabda'a sinnaanta iyo cadaaladda.

2. Xoojinta awoodda hay'adaha la shaqeeya shaqaalaha socdaalaya, iyada oo la sameynayo Xarumaha adeegyada ilaalinta bulshada ee shaqaalaha socdaalaya hoos yimaada MoLSA iyo hay'adaha kale ee shaqada. Guddi saddex-geesood ah (tripartite committee) oo horumariya cilmi-baarista iyo xogta la xiriirta ilaalinta bulshada ee shaqaalaha socdaalaya.
3. Dhisidda Heshiisyada Laba-geesoodka ah ee Shaqada (BLAs) iyo heshiisyada ilaalinta amniga bulsho ee Multilateral-ka, si loo hubiyo hantida shaqaalaha la socda iyo inay helaan gunnooyinka ay xaqa u leeyihiin.
4. Taageeridda hirgelinta Heshiiska Suuqa Wadajirka ah ee Bariga Afrika (EAC Common Market 2003) ee isku-xirka xuquuqda amniga bulshada iyo gunnooyinka shaqaalaha.

#### **Qeybaha 4: Xoojinta Dooraka Wada-hawlgalayaasha Bulshada, La-hawlgalayaasha Horumarinta iyo Ganacsiga Gaarka loo leeyahay (Strengthening the Role of Social Partners, Development Partners and the Private Sector)**

Tallaabooyinka muhiimka ah ee la qaadayo waxaa ka mid ah:

1. Dhisidda awoodda wada-hawlgalayaasha bulshada (Social Partners) si ay uga qaybqaataan wadahadalka la xiriira socdaalka shaqaalaha.
2. Taageeridda wada-hawlgalayaasha bulshada, iyada oo loo marayo wadashaqeyn, wacyigelin iyo kor-u-qaadid awoodeed, si ay shaqaalaha u abaabulaan una difaacaan xuquuqdooda.
3. Taageeridda dooraka wada-hawlgalayaasha bulshada ee difaaca xuquuqda shaqaalaha socdaalaya, gaar ahaan helitaanka cadaaladda iyo difaaca sharci.
4. Xoojinta iskaashiga ka dhexeeya dowladda, la-hawlgalayaasha horumarinta, iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, si loo xoojiyo nidaamka socdaalka shaqaalaha.

Qeybaha Muhiimka ah ee Fulinta Siyaasadda Socdaalka Shaqaalaha

#### **Qeybta 5: Xoojinta Ururinta, Maareynta, iyo Faafinta Xogta La Xiriirta Socdaalka Shaqaalaha**

Tallaabooyinka muhiimka ah ee la qaadayo waxaa ka mid ah:

1. **Ku daridda xogta la xiriirta socodka shaqaalaha** nidaamka **Labour Market Information System (LMIS)** si loo helo xog sax ah oo la jaan-qaadaysa horumarka suuqa shaqada.
2. **Dhisidda qaab-xisaabeed (statistics framework)** si joogto ah looga warbixiyo xogta la xiriirta shaqaalaha socdaalaya, iyada oo la waafajinayo talo-soojeedinta **International Conference of Labour Statisticians (ICLS)**.
3. **Samaynta sahanno joogto ah oo lagu sameeyo xoogga shaqaalaha**, kuwaas oo diiradda saari doona shaqaalaha socdaalaya iyo maaraynta jaaliyadda dibadda, si loo helo xog tayo leh oo ay la jaan-qaadi karto xeerarka ICLS.
4. **Dhisidda awoodda dowladdu u leedahay in ay ururiso, falanqeyso, iyo faafiso xogta la xiriirta socdaalka shaqaalaha**, iyada oo la kala saarayo xogta jinsiga iyo astaamo kale oo muhiim ah.
5. **Hubinta in xogta la heli karo** si loo fududeeyo helitaanka xog sax ah ee hay'adaha dowladda, warbaahinta, jaamacadaha, ururada bulshada, hay'adaha horumarinta iyo daneeyayaasha kale ee gaarka loo leeyahay.

## **Qeybta 6: Sharciyeynta iyo Maareynta Hay'adaha Shaqaaleysiinta Gaarka ah (PEAs)**

Tallaabooyinka muhiimka ah ee la qaadayo waxaa ka mid ah:

1. Dhisidda qaab sharciyeed, siyaasadeed, iyo nidaamyo xakameynaya Hay'adaha Shaqaaleysiinta Gaarka ah (Private Employment Agencies - PEAs).
2. Fulinta tilmaamaha sharciyeed ee maareynta iyo dabagalka PEAs, si loo hubiyo in ay raacaan hab-raacyo cadaalad ah.
3. Hirgelinta barnaamijyo dhisaya awoodda si lagu maamulo Shirkadaag Shaqaaleysiinta Gaarka, si loo hagaajiyo nidaamka shaqaaleysiinta, loogana hortago xadgudubyada xuquuqda shaqaalaha. Barnaamijyadani waxay diiradda saari doonaan: Habraacyada kahor socdaalka (pre-departure processes). Tababarida shaqaalaha socdaalaya (training before departure). Soo dhaweynta dalka loo socdaalay (arrival and post-arrival support). Xaaladaha shaqada dalka loo tagay (working conditions in the destination country). Dib-u-soo laabashada iyo dib-u-dhexgalka (return and re-integration).
4. Horumarinta sharciyo xoojinaya la xisaabtanka Shirkadaag Shaqaaleysiinta Gaarka, si loo hubiyo in hay'adaha shaqaaleysiinta ay raacaan xeerar sugan.

## **Qeybta 7: Xoojinta Nidaamyada Dib-u-soo Laabashada iyo Dib-u-dhexgalka Shaqaalaha Socdaalaya**

Tallaabooyinka muhiimka ah ee la qaadayo waxaa ka mid ah:

1. Taageeridda Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) si ay qorshe u dejiso dib-u-soo laabashada shaqaalaha socdaalaya, lana dhiso nidaam bixiya macluumaad, tababar, iyo taageero sharciyeed si shaqaalaha ay dib ugu dhexgalaan dalka.
2. Taageeridda dadaallada hay'adaha maaliyadeed, si loo bixiyo adeegyo ay ka mid yihiin xisaabaadka dadka aan deganeyn (non-resident accounts), taasoo qeyb ka ah dadaallada lagu ilaalinayo shaqaalaha socdaalaya si ay uga fogaadaan khasaaro maaliyadeed.
3. Fududeynta wareejinta xawaaladaha iyo lacagaha (remittances flow), iyadoo la xoojinayo nidaamka isku-gudbinta faa'iidooyinka ilaalinta bulshada (portability of social protection benefits).
4. Dib-u-midaynta qoysaska iyo carruurta shaqaalaha soo laabtay, si loogu biiro nidaamyada waxbarashada iyo tababarka xirfadaha qaranka, taasoo ka caawinaysa horumarinta fursadaha shaqo ee mustaqbalka.
5. Dhisidda nidaam dabagal (follow-up mechanism) oo leh xarun cabasho iyo xal-u-helid (complaints and redress facility), si looga hortago caqabadaha ka dhasha dib-u-soo laabashada iyo dib-u-dhexgalka shaqaalaha.

## **Qeybta 8: Ka-faa'iideysiga Doorka Jaaliyadda Soomaaliyeed ee Dibadda**

Faragelinnada muhiimka ah ee hoos imanaya aaggan siyaasadeed waxaa ka mid ah:

1. Dhisidda iyo xoojinta adeegyada qunsuliyadaha iyo wakiillada shaqaalaha (oo ay ku jiraan hannaan cabasho iyo xal u helid) ee safaaradaha, qunsuliyadaha, iyo xafiisyada dibadda si ay u fuliyaan sahanno joogto ah oo lagu ogaanayo xaaladda qurbo-joogta (oo ay ka mid yihiin xogta tiradooda, goobaha ay ku sugan yihiin, xirfadaha ay leeyihiin, jinsiga iyo adeegyada ay u baahan yihiin);
2. Taageeridda shaqada shabakadaha iyo ururrada qurbo-joogta si ay u taageeraan shaqaalaha muhaajiriinta ah;
3. Dhisidda iyo fududeynta xarun lagu mideeyo wada-shaqeynta qurbo-joogta;
4. iv. Kordhinta wacyigelinta bulshada iyo go'aan-qaadeyaasha siyaasadeed ee ku saabsan kaalinta ay qurbo-joogtu ku leeyihiin horumarka qaranka.

# 4

## Aragtida is-beddelka

---


### 4.1. Istaraatiijiyadda La Dhaqan Gelinayo Iyadoo La Adeegsanayo Aragti Is-bedel (Theory of Change)

Istaraatiijiyaddan waxay qeexaysaa aasaaska fikradeed iyo arrimaha horseedaya ee sharxaya sida waddooyin kala duwan u keenayaan saameynta la rabo, iyadoo la adeegsanayo habka **Aragtida Is-bedelka**. Qaab-dhismeedkan waxa uu sharxayaa sida aragtida iyo himilada siyaasadda loo gaari doono, isagoo siinaya sharaxaad faahfaahsan oo talaabo-tallaabo ah oo ku saabsan hababka iyo hanaanka la raacayo.

Aragtida Is-bedelka waxay ka kooban tahay:

1. Yoolalka muddada dheer – Natiijooyinka iyo saameynta la hiigsanayo.
2. Natiijooyinka mudada dhexe – Talaabooyinka iyo is-bedellada horseedaya yoolalka muddada dheer.
3. Faragelinnada – Tallaabooyinka ama barnaamijyada khaaska ah ee is-bedelka keeni doona.
4. Natijada (Outputs) – Natiijooyinka tooska ah ee ka dhalanaya faragelinnada.
5. Malayaasha (Assumptions) – Aragtiyada ama aaminsanaanta sharxaysa sababta natiijooyinkaas u dhici karaan.
6. Dhaqaajiyaasha (Drivers) – Arrimaha dibadda ee saameyn kara natiijooyinka.

Samaynta Aragtida Isbeddelka MoLSA oo hogaaminaysa fulinta Hirgelinta Aragtida Is-bedelka Iyadoo la horumarinayo Aragtida Is-bedelka, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA), oo ah hay'adda hormuudka u ah hirgelinta, waxay awood u yeelan doontaa: Inay qeexdo yoolalka iyo aasaaska fikradeed



ee siyaasadda. Inay aqoonsato arrimaha dhaqaajinaya is-bedelka. Inay mudnaanta siiso faragelinnada iyo kheyraadka. Inay ka hor-timaaddo caqabadaha iyo khataraha iman kara. Inay cabbirto horumarka iyo saameynta siyaasadda.

Samaynta Aragtida Isbeddelka, MoLSA oo hogaaminaysa fulinta waa inay awood u yeelataa inay caddayso yoolalka iyo malo-awaalka, aqoonsato darawallada muhiimka ah ee isbeddelka, mudnaanta koowaad siiso waxqabadyada iyo agabka, odoroso khataraha iyo caqabadaha iman kara, cabbira horumarka iyo qiimaynta saamaynta. Sida lagu muujiyey jaantuska Aragtida Isbeddelka ee bogga soo socda, dhammaan dadaallada lagu hirgelinayo siyaasadda waxay diiradda saari doonaan sameynta qaab-dhismeedka joogtada ah ee socdaalka shaqada. Tan waxaa lagu gaari doonaa iyada oo la dhisayo habayn hay'ad isku xiran oo taageerta faragelino kala duwan, hubinta hirgelinta siyaasadda xuquuqaha ku salaysan iyo ka jawaabista jinsi

Sida ku cad jaantuska **Aragtida Is-bedelka** ee bogga xiga, dhammaan dadaallada lagu hirgelinayo siyaasaddan waxay diiradda saari doonaan dhismaha qaab-dhismeed waara oo lagu maareeyo socdaalka shaqaalaha. Tani waxay ku imaan doontaa iyada oo la dhisayo hab-raac isku dhafan oo hay'adaha iskaashanaya ay ku hawlgalaan, si loo xaqiijiyo hirgelin siyaasadeed oo ku saleysan xuquuq iyo la jaanqaadaysa sinnaanta jinsiga.

## Muddada Dheer

Dowladda waxay xaqiijin doontaa in sharciyadda la xoojiyo, iyadoo laga duulayo Xeerka Shaqada ee la casriyeeyay iyo Heshiisyada ILO ee Soomaaliya saxiixday. Tani waxay horseedi doontaa socdaal shaqo oo badbaado leh, nidaamsan, oo joogto ah.

## Muddada Dhexdhexaadka


Dowladda, iyadoo la kaashanaysa hay'adaha saddex-geesoodka ah (tripartite arrangement), waxay gacan ka geysan doontaa:

- ▶ Xoojinta xuquuqda shaqaalaha socdaalka ah, gudaha iyo dibadda.
- ▶ Horumarinta xirfadaha shaqaalaha.
- ▶ Ilaalinta sharafta iyo xasilloonida shaqaalaha.
- ▶ Wada-shaqeynta la leh qurbo-joogta, si loo dhiso bulsho firfircoon oo kaalin muuqata ka qaadata horumarka shaqaalaha socdaalka ah iyo horumarka qaranka.
- ▶ Sameynta **Nidaamka Maaraynta Macluumaadka Socdaalka Shaqaalaha (Labour Migration Information System - LMIS)** si loo helo xog lagu hago wadhadalka siyaasadeed iyo dib-u-habeynta.


## Muddada Gaaban iyo Degdegga ah

Dowladdu waxay fulin doontaa tallaabooyin muhiim ah oo degdeg ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- ▶ Dhameystirka sharciyada muhiimka ah iyo heshiisyada laba-geesoodka ah (BLAs).
- ▶ Isku-darka arrimaha guud ee muhiimka ah, sida sinnaanta jinsiga, daryeelka dadka naafada ah, iyo la qabsiga is-bedelka cimilada, ee qorsheynta iyo hirgelinta.
- ▶ Xoojinta hababka dib-u-celinta iyo dib-u-habeynta shaqaalaha socdaalka ah ee dalka kusoo laabanaya.



► Aragtida Isbeddel ka ee Sharaxan



# ▶ 5

## Doorka iyo mas'uuliyadaha daneyaash

---


Ra'iisul Wasaaraha, oo ah hoggaamiyaha garabka fulinta ee Dowladda, ayaa kormeer guud ku yeelan doona hirgelinta siyaasaddan, isagoo hubinaya in xiriir joogto ah uu dhex maro Golaha Wasiirrada iyo Baarlamaanka.

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) ayaa mas'uul ka noqon doonta fulinta maalinlaha ah, kormeerka, iyo diyaarinta warbixinnada ku saabsan hirgelinta siyaasadda.

Si loo xaqiijiyo hab loo dhan yahay oo ay Dowladda iyo bulshadu wada leeyihiin, Dowladda waxay horumarin doontaa siyaasad iyo qaab-dhismeed hay'adeed oo dhiirrigelinaya iskaashi, isku-xirnaan iyo mideyn lagu fuliyo siyaasadda.

Tani waxay dhisi doontaa nidaam isku dhafan, waara oo suurtagelinaya socdaalka shaqaalaha si habaysan. Dowladda waxay dejin doontaa nidaam mideysan, isku xidhan, oo si wanaagsan loo maalgeliyay, kaas oo ku saleysan qaab fulineed oo faahfaahsan (sida hoos ku muujisan).

► Jaantus Sharaxaya Qaabka Hirgelinta Siyaasadd




Dowladdu waxay xoojin doontaa Nidaamka Isku-xirnaanta Qaranka (NCM) ee Socdaalka (oo ka masuul noqon doona hirgelinta siyaasaddan ee socdaalka shaqaalaha iyo hawlgallada kale ee muhiimka ah). NCM waxaa taageeri doona Guddiga Isku-xirnaanta ee Socdaalka Shaqaalaha oo ka kooban Wasaaradaha, Waaxda, iyo Hay'adaha Dowladda (MDAs), waxaana guddoomin doona MoLSA. Hoos nidaamkan, Xafiiska Madaxweynaha waxaa matali doona Wakiil Gaarka ah ee Socdaalka, Soo-noqoshada iyo Xuquuqda Carruurta. Xarunta Kheyraadka Socdaalka ee Qaranka ayaa ka warbixin doonta Guddiga Isku-xirnaanta oo martigelin doonta Nidaamka Macluumaadka Suuqa Shaqada ee Qaranka (LMIS), iyo hawlgallo kale. MoLSA, iyadoo loo marayo barnaamijka Wada-hawlgalayaasha Bulshada, waxay wada shaqeyn doontaa ururka FESTU, Golaha Ganacsiga Soomaaliyeed, bulshada qurbo-joogta, wada-hawlgalayaasha horumarinta, iyo actors-ka aan dowliga ahayn si loo horumariyo hirgelinta siyaasaddan. Heerka Federaalka ee Dawladaha Xubnaha, siyaasaddan waxay ka hirgelin doontaa dalka oo dhan, iyadoo la taageerayo Agaasimayaasha Guud iyo Xarumaha Shaqaalaha ee waaxaha Shaqada ee si buuxda u aasaasan. Ugu dambeyntiina, shaqaalaha socdaalka ee gudaha iyo dibedda ayaa noqon doona kuwa ugu faa'iideysan doona siyaasaddan si ay ugu faa'iideystaan si wanaagsan socdaalka shaqada. Qodobadan soo socda ayaa noqon doona doorka muhiimka ah ee hay'adaha hoggaaminta ee hirgelinta siyaasadda:

Hay'adda	Mas'uuliyadaha Fulinta Siyaasadda
Xafiiska Madaxweynaha	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Guddoominta Hannaanka Isku-xirka Qaranka ee Socdaalka"</li> <li>► Bixinta Taageerada Ergayga Gaarka ah ee Socdaalka, Soo-noqoshada, iyo Xuquuqda Carruurta.</li> </ul>
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Isku-dubaridka wasaaradaha, hay'adaha, iyo waaxyaha si loo hubiyo hirgelinta waxtarka leh ee waajibaadkooda iyo in la soo gudbiyo warbixinno la xiriira tallaabooyinka lagu gaari karo yoolalka siyaasadda.</li> <li>► Wakiil ka noqoshada dalka shirarka goboleed iyo caalami ah ee la xiriira socdaalka shaqaalaha."</li> </ul>
Baarlamaanka	<ul style="list-style-type: none"> <li>► In la xaqiijiyo in dhaqaale iyo agab ku filan loo qoondeeyo fulinta siyaasadda</li> <li>► Sameynta, dib-u-eegista, iyo kormeerka hirgelinta siyaasadda.</li> <li>► Dejinta, dib-u-eegista, iyo la socodka dhaqan-gelinta siyaasadda</li> </ul>
Xeer Ilaaliyaha Guud	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Qaab-dhismeedka Sharciga iyo Dib-u-eegista Siyaasadda</li> <li>► Wakiilnimo Arrimaha Sharciga</li> <li>► Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha Socdaalka</li> <li>► Bixinta Talo Sharciyeed ee hanaanka Xallinta Khilaafaadka</li> <li>► Wada-shaqeynta Hay'adaha iyo Maamulka Garsoorka</li> <li>► Dabagalka Saamaynta Sharciga ee Socdaalka Shaqaalaha</li> <li>► Lataliyidda Xeerarka Socdaalka iyo Shaqaaleysiinta</li> <li>► Difaacista Dib-u-habeynta Xeerarka Socdaalka Shaqaalaha</li> </ul>
Hannaanka Isku-xirka Qaranka	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Isku-dubaridka guddi-hoosaadyada iyadoo la adeegsanayo hab-qaran iyo hab-bulsho si loo wadaago macluumaadka, loona xoojiyo jawaabaha isku-dubbaridan ee heer qaran ee mudnaanta la siinayo arrimaha socdaalka, oo ay ku jirto socdaalka shaqaalaha.</li> </ul>
Guddiga Isku-xirka Qaranka ee Socdaalka Shaqaalaha Soomaaliya	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Guddigan, oo uu guddoominayo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA), wuxuu ka koobnaan doonaa wakiillo ka socda hay'adaha muhiimka ah ee dowladda iyo wada-hawlgalayaasha bulshada. Ujeeddada ugu weyn ee guddigan waa in la xoojiyo isku-xirka daneeyayaasha kala duwan iyo in la hubiyo hirgelinta siyaasadda si mideysan oo isku-dhahan.</li> </ul>

Hay'adda	Mas'uuliyadaha Fulinta Siyaasadda
Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada	<ul style="list-style-type: none"> <li>▶ hoggaaminta guud, hagidda, iyo taageerada farsamo si loo fududeeyo hirgelinta waxtarka leh ee siyaasadda dhammaan daneeyayaasha.</li> <li>▶ Dhisidda iyo isku-dubaridka xafiis isku-xir qaran si loo kormeero hirgelinta siyaasadda.</li> <li>▶ Wada-xaajood la yeelashada bah-wadaagta horumarineed si loo abaabulo kheyraad.</li> <li>▶ Isku-dubarid miisaaniyadda, qorsheynta istiraatiijiga ah, sharciyeynta, iyo hirgelinta siyaasadaha across waaxyaha kala duwan.</li> <li>▶ Fududeynta dhammaystirka Heshiisyada Labo-geesoodka ee Socdaalka Shaqaalaha (BLMAs).</li> <li>▶ Kormeerka la jaanqaadidda, hirgelinta, iyo warbixinta heerarka caalamiga ah ee shaqaalaha.</li> <li>▶ Bixinta rukhsadaha shaqada.</li> <li>▶ Hagidda habraacyada guud iyo adeegyada la xiriira shaqaalaha Soomaaliyeed ee dibadda u socda shaqo-doon.</li> <li>▶ Hoggaaminta hirgelinta Nidaamka Xogta Suuqa Shaqada, iyadoo lala kaashanayo Hay'adda Qaranka ee Istaatikada (Tirakoobka) Soomaaliya, si loo soo saaro, loo maareeyo, loona faafiyo xogta socdaalka shaqaalaha.</li> </ul>
Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah	<ul style="list-style-type: none"> <li>▶ Martigelinta Waaxda Qurbo-joogta, taasoo kormeerta hirgelinta siyaasadda qaran ee jaaliyadda dibadda. Siyaasaddan waxay xiriir dhow la leedahay socdaalka shaqaalaha, sida lagu xusay dukumeentigan."</li> <li>▶ Taageeridda dadaallada iyo habraacyada sharciyeynta ee lagu hirgelinayo siyaasadda socdaalka shaqaalaha gudaha iyo dibadda.</li> <li>▶ Taageeridda dejinta iyo dhaqan-gelinta Heshiisyada Labo-geesoodka ee Socdaalka Shaqaalaha si loo hubiyo in shaqaalaha ay helaan faa'iidooyin wanaagsan. Fududeynta shaqada safaaradaha, qunsuliyadaha, iyo xafiisyada diblomaasiyadeed si ay u taageeraan qurbo-joogta.</li> </ul>
Wasaaradda Waxbarashada	<ul style="list-style-type: none"> <li>▶ Aqoonsiga shahaadooyinka iyo xirfadaha shaqaalaha socdaalka ee gudaha iyo dibadda.</li> <li>▶ Taageeridda horumarinta xirfadaha ee machadyada Waxbarashada Farsamada iyo Tababarka Xirfadaha (TVET) iyo jaamacadaha, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo heerarka waxbarashada ilaa heer Diploma.</li> <li>▶ Waa in la ogaadaa in waajibaadka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) uu daboolayo horumarinta xirfadaha ilaa heer Diploma, halka Wasaaradda Waxbarashadu ay mas'uul ka tahay waxbarashada ka sarreysa heerka Diploma.</li> </ul>
Wasaaradda Amniga Gudaha	<ul style="list-style-type: none"> <li>▶ Maareynta habraacyada dhalashada, socdaalka, iyo maamulka kastamada</li> <li>▶ Taageeridda tallaabooyinka waxtarka leh ee xuduudaha si loo fududeeyo socdaal ammaan ah oo nidaamsan.</li> </ul>
Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqda Adanaha	<ul style="list-style-type: none"> <li>▶ Horumarinta iyo hirgelinta siyaasado, xeerar, iyo barnaamijyo is-dhexgal ah si loo hubiyo horumarka, daryeelka, iyo ilaalinta qoysaska iyo carruurta.</li> <li>▶ Xoojinta habraacyada la xiriira maareynta cabashooyinka si loo yareeyo nuglaanta shaqaalaha socdaalka, gaar ahaan haweenka, oo ay ku jiraan kuwa qurbo-joogta ah.</li> <li>▶ Dhiirrigelinta haweenka qurbo-joogta ah si ay maalgelin ugu sameeyaan dalka.</li> </ul>
Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha	<ul style="list-style-type: none"> <li>▶ Taageeridda qaabeynta iyo hirgelinta siyaasadaha kobcinaya shaqaaleysiinta, qorsheynta, iyo miisaaniyadda.</li> <li>▶ Bixinta taageero dhaqaale si loo hirgeliyo siyaasadaha, iyadoo la hubinayo in kheyraadka si hufan loo qoondeeyo lagana xisaabtamo. hirgelinaysaa nidaam xisaabeed hufan si loo xaqiijiyo in kheyraadka la isticmaalo si waafaqsan baahiyaha shaqaalah</li> </ul>

Hay'adda	Mas'uuliyadaha Fulinta Siyaasadda
Wasaaradda Horumarinta Qoyska iyo Xuquuqda Aadanaha	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Ilaalinta xuquuqda shaqaalaha socdaalka.</li> <li>► Dhiirrigelinta sinnaanta jinsiga ee socdaalka shaqaalaha.</li> <li>► Bixinta taageero loo fidinayo kooxaha nugul ee shaqaalaha socdaalka.</li> <li>► Sii wadida u doodista iyo bixinta kaalmo sharciyeed ee shaqaalaha socdaalka.</li> <li>► La shaqeynta hay'adaha xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah.</li> <li>► Horumarinta siyaasado la xiriira dib u midoobidda qoysaska.</li> <li>► Dabagalka iyo soo saarista warbixinnada la xiriira daryeelka shaqaalaha socdaalka.</li> <li>► Hirgelinta ololayaal wacyigelin iyo barnaamijyo waxbarasho oo ku saabsan xuquuqda shaqaalaha socdaalka.</li> <li>► Isku-dubaridka barnaamijyada ilaalinta bulsho ee shaqaalaha socdaalka.</li> <li>► Hubinta in siyaasadaha iyo xeerarka la jaanqaadaan heerarka xuquuqda aadanaha.</li> </ul>
Wasaaradda Caafimaadka	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Qiimeynta xaaladda caafimaadka shaqaalaha iyo go'aaminta baahiyaha daryeel caafimaad.</li> <li>► waxay hubinaysaa in dhammaan shaqaalaha helaan caymis caafimaad iyo adeegyada lagama maarmaanka ah.</li> <li>► Wasaaradda Caafimaadka waxay xoojinaysaa dadaallada lagu ilaalinayo caafimaadka dadweynaha iyo ka hortagga cudurrada faafa.</li> <li>► Iskaashi lala yeesho hay'adaha caalamiga ah si loo xoojiyo nidaamka daryeelka caafimaadka shaqaalaha.</li> <li>► Cilmi-baaris joogto ah iyo dabagal lagu sameeyo xaaladaha caafimaadka si loo hagaajiyo adeegyada caafimaad.</li> <li>► Hirgelinta barnaamijyo wacyigelin caafimaad ah si bulshada loogu baraarujiyo muhiimada nadaafadda iyo ka hortagga cudurrada.</li> <li>► Xuquuqda caafimaad ee shaqaalaha socdaalka waa in la ilaaliyo oo la hormariyo si ay helaan daryeel caafimaad oo habboon.</li> </ul>
Hay'adda Qaranka ee Istaatikada Soomaaliya	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Qorsheynta iyo sameynta sahanno si loo uruuriyo xog muhiim ah oo ku saabsan socdaalka shaqaalaha.</li> <li>► Uruurinta iyo faafinta tirakoobka si loogu daro Nidaamka Macluumaadka Suuqa Shaqada (the Labour Market Information System LMIS).</li> <li>► In la taageero maamul-daadejinta iyo kala-soocidda adeegyada tirakoobka iyo bixinta kaalmo farsamo oo ku saabsan soo-saarka tirakoobka shaqada.</li> <li>► In la diiwaan geliyo oo la faafiyo daraasaadka cilmi-baarista iyo qiimeynta mawduucyada ee isbeddellada soo baxaya ee qorsheynta shaqaalaynta, iyadoo la siinayo aragtiyo siyaasadeed si loo ogeysiyo hirgelinta. Ka qayb-qaado hirgelinta Nidaamka Macluumaadka Suuqa Shaqada, iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Shaqada MoLSA, si loo soo saaro, loo maareeyo oo loo faafiyo xogta socdaalka shaqada.</li> </ul>
Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Bixinta fiisooyinka iyadoo la raacayo xeerarka la dejiyey. Difaacida xakamaynta xuduudaha iyo sharciyada socdaalka. Dukumeentiga iyo diiwaangelinta shaqaalaha socdaalka.</li> <li>► Sameynta qiimeyn ku saabsan suuqa shaqada iyo go'aaminta tirada shaqaalaha loo baahan yahay.</li> <li>► Wada-shaqeynta loo leeyahay loo-shaqeeyayaasha iyo shirkadaha shaqaaleysiinta. Kormeerka iyo hirgelinta shuruudaha shaqo ee loo-shaqeeyayaasha shaqaalaha socdaalka.</li> <li>► Isku-xirnaanta hay'adaha kale ee dowladda.</li> <li>► Hubinta in la raaco heerarka caalamiga ah ee socdaalka."</li> <li>► Sameynta ololayaal wacyigelin iyo wacyigelin dadweyne oo ku saabsan socdaalka.</li> <li>► Ka jawaabista wax ka qabashada dhibaatooyinka socdaalka ama xaaladaha degdegga ah</li> </ul>

Hay'adda	Mas'uuliyadaha Fulinta Siyaasadda
Hay'adaha Horumarinta ee Caalamiga ah	<ul style="list-style-type: none"> <li>► In uu gacan ka geysto abaabulka ilaha dhaqaale si loo xaqiijiyo hirgelinta qodobbada siyaasaddan.</li> <li>► Bixinta kaalmo farsamo inta lagu jiro muddada fulinta siyaasadda, sida loo baahan yahay, oo ay ku jiraan samaynta dib u eegis istiraatiijiyadeed, qiimayno iyo daraasado kale.</li> <li>► In la wadaago hababka ugu wanaagsan ee caalamiga ah ee socdaalka shaqada.</li> </ul>
Dowlad Goboleedyada	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Ku darista qorsheynta shaqada iyo isku-xirnaanta arrimaha shaqada iyo shaqaaleysiinta heer dowlad goboleed.</li> <li>► In ay kormeeraan hirgelinta siyaasadaha heer deegaan.</li> <li>► Hubita shaqaaleysiinta iyo dejinta shaqaalaha kormeerayaasha shaqada.</li> <li>► Fulinta sharciga shaqada.</li> <li>► Taageeridda hirgelinta sharciga shaqada iyo adeegyada shaqaaleysiinta ee la xiriira</li> </ul>
Kormeerayaasha Shaqada ee Heer Degmo	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Dabagalka la socodka iyo dhaqan gelinta heerarka shaqada iyo siyaasadaha socdaalka ee heer degmo.</li> </ul>
Wada-hawlgalayaasha Bulshada	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Taageeridda u hogaansanaanta heerarka iyo xeerarka la dejiyey.</li> <li>► Difaacista horumarinta xuquuqda shaqaalaha, ilaalinta iyo wada-xaajoodka guud.</li> <li>► Sameynta cilmi-baaris, kaydinta iyo diiwaangelinta iyo wadaagista natiijooyinka si loo taageero hirgelinta siyaasadda.</li> </ul>
Ganansiga Gaarka Ah	<ul style="list-style-type: none"> <li>► Dhamaystirka dadaallada dowladda iyadoo la siinayo khibrad, dakhli iyo hal-abuurnimo dhinaca shaqada.</li> <li>► Abuurka fursado shaqo, oo ay ku jiraan horumarinta tignoolajiyada iyo hal-abuurka.</li> <li>► Taageerida tababarada warshadaha, tababarada shaqada iyo shaqooyinka tababarka.</li> <li>► Kobcinta iskaashiga dawladda iyo Ganansiga gaarka ah ee shaqo abuurka.</li> </ul>
Dhaqdhaqaaqayaasha Aan Dowliga Ahayn (NGOs iyo Ururrada Bulshada Rayidka ah (CSOs), Jaamacadaha, Warbaahinta)	<ul style="list-style-type: none"> <li>► La shaqeynta dowladda si loo xaqiijiyo hirgelinta waxtarka leh ee barnaamijyada horumarinta shaqo.</li> <li>► Difaacista u hoggaansanaanta heerarka shaqada iyo xeerarka si loo ilaaliyo xuquuqda shaqaalaha socdaalka.</li> <li>► Taageeridda iyo ka qayb qaadashada tababarka iyo cilmi-baarista dhinacyada kala duwan ee shaqo-abuurka.</li> <li>► Aqoonsiga iyo la wadaagista dhaqamada ugu wanaagsan ee wada-hawlgalayaasha bulshada.</li> <li>► Difaacista nidaamyada dabagalka iyo kormeerka si loo hubiyo u hoggaansanaanta heerarka ugu hooseeya ee shaqada iyo sharciga.</li> <li>► Faafinta mabda'a siyaasaddan iyada oo loo marayo warbaahinta kala duwan.</li> </ul>



# ▶ 6

## Khatarooyinka, caqabadaha iyo qiyaasaha la fili karo

### 6.1. Khaatarooyinka iyo Caqabadaha

Hirgelinta siyaasadda socdaalka shaqaalaha waxay wajahaysaa khaataro muhiim ah, kuwaas oo ugu waaweyn colaadda sibilka ee Soomaaliya. Colaaddan ayaa khatar weyn ku ah hirgelinta siyaasadda. Waxaa la rajeynayaa in dadaallada nabadeynta ay sii socdaan sanadaha soo socda ee tobanka ah si loo abuuro jawi ku habboon socdaalka ammaan ah, nidaamsan, iyo joogto ah.

Khaatarooyin iyo caqabado dheeraad ah waxaa ka mid ah:

1. Caqabadaha isku-xirnaanta hay'adaha iyo wada-hawlgalayaasha bulshada.
2. Xog xaddidan oo ku saabsan socdaalka shaqaalaha oo ay ku jirto kala soocid la'aan xogta.
3. Qaab-dhismeed daciif ah oo aan jirin oo loogu talagalay maamulka shaqada, oo lagu garto isku-xirnaan xaddidan oo u dhaxeysa daneeyayaasha muhiimka ah.
4. Barnaamijyo iyo khayraad xaddidan oo lagu taageerayo shaqaalaha socdaalka gudaha iyo dibedda.
5. Barnaamijyo iyo khayraad aan ku filnayn oo lagu taageerayo shaqaalaha socdaalka gudaha iyo dibedda, oo ay ka mid yihiin:
  - ▶ Tababarka kooban ee shaqaalaha socdaalka ka hor bixitaanka.
  - ▶ Xeerar xaddidan oo lagu xakameeyo iyo taageeridda shaqaalaha laga hayo Hay'adaha Shaqo ee Gaarka loo leeyahay (PEAs), taas oo keentay kiisaska xadgudubyada xuquuqda iyo khaladaadka.
  - ▶ Isbeddelka cimilada oo la filayo inuu saameeyo qaab-dhismeedyada cimilada. Waxaa sidoo kale jira daciifnimo ku saabsan nidaamyada digniinta hore ee dowladda, taas oo sii xumeynaysa

khatarta. Khatartan waxaa u badan inay soo baxdo sida amni-darro cuntada, taasoo keenaysa socdaal dibedda maadaama Soomaalidu ay u guuraan dalal bixiya fursado nololeed iyo shaqo oo wanaagsan.

6. Si loo yareeyo khaatarooyinkan, dowladda waxay hirgelinaysaa faragelinno soo socda:

- Dib u habeynta Kooxaha Shaqada Farsamada si loo xoojiyo xiriirka shaqo ee ka dhaxeeya kooxaha kala duwan iyo guddiyada.
- Samaynta sahanno shaqo iyo horumarin nidaamka xogta suuqa shaqada ee MoLSA.
- Sameynta siyaasado iyo xeerar, oo ay ku jiraan tilmaamo loogu talagalay PEAs, si loo taageero shaqaalaha socdaalka iyo in la xoojiyo xayiraadda hadda jirta.
- Bixinta tababarka ka hor bixitaanka ee shaqaalaha socdaalka iyada oo loo marayo hay'ado kala duwan.

## 6.2. Qiyaasaha

Marka laga soo tago khatarooyinka kor ku xusan, qaab-dhismeedkan natiijada wuxuu ku saleysan yahay qiyaasaha soo socda, kuwaas oo muhiim u ah hirgelinta guulaha siyaasadda:

1. Ka-qaybgalka iyo wada-shaqeynta firfircoon oo joogtada ah ee dhammaan daneeyayaasha heerarka qaran iyo dawladaha goboleed.
2. Iskaashiga laba-geesoodka ah ee dalalka martigelinta.
3. Dowladda oo sii wadda heysta ballan qaadka heerarka shaqada caalamiga ah.
4. Shirkadaha shaqo oo diyaar u ah inay raacaan xeer-nidaamiyaahsa.
5. Taageero firfircoon oo ka timaadda wada-hawlgalayaasha bulshada iyo hay'adhooda taageeraya.
6. Helitaanka khayraadka iyo iskaashiga wada-hawlgalayaasha horumarinta.
7. Fududeynta kormeerayaasha iyo ka go'naanshaha inay raacaan heerarka shaqada.
8. Aqbalaadda shaqaalaha socdaalka dibedda inay ka qayb qaataan shabakadaha qurbo-joogta iyo kulamada.
9. Maalgelin ku filan oo loogu talagalay kaabayaasha adag iyo jilicsan ee barnaamijyada tababarka.
10. Iskaashiga iyo ka-qaybgalka joogtada ah ee ka dhexeysa dowladda federaalka iyo dawladaha xubnaha.
11. Danta guud ee arrimaha shaqaalaha socdaalka.
12. Iskaashiga hay'adaha waxbarashada iyo dhexdhexaadiyayaasha maaliyadeed.
13. Maalgelin ku filan iyo khiBrad ku saabsan warbixinta tirakoobka.
14. Iskaashiga waxtarka leh ee u dhexeeya kooxaha qurbo-joogta iyo dowladda.
15. Maalgelin ku filan iyo shaqaale ku filan oo loogu talagalay adeegyada dib-u-habeynta.
16. Safaaradaha, qunsuliyadaha iyo wakiilada si buuxda u shaqeynaya si ay taageero uga geystaan hirgelinta siyaasadda.




## Wakhtiga iyo himiloyinka la gaarayo

---

Si loo hawlgeliyo siyaasaddan, istaraatiijiyaddan waxaa lagu hirgelin doonaa laba marxaladood muddo tobanka sano ah: istaraatiijiyaddan (2025-2034). Marxaladda 1-aad waxay bilaaban doontaa 2025 ilaa 2030. **Dib-u-eegis dhexdhexaad ah** ayaa la qaban doonaa 2028, iyo **qiimaynta ugu dambaysa** ayaa la sameyn doonaa 2030. Kahor dhammaadka Marxaladda 2-aad, qiimaynta ugu dambaysa ee siyaasadda lafteeda ayaa la qaban doonaa.

Inta lagu jiro muddada hirgelinta, Dowladda iyo hay'adaha fulinta ayaa sii wadaya hirgelinta maamulka socdaalka shaqaalaha iyo faragelinnada la xiriira, iyada oo lagu hageyo MoLSA iyo Guddiga Isku-xirnaanta ee Socdaalka Shaqaalaha. Jadwalka hoos ku xusan ayaa faahfaahinaya wakhtiga hirgelinta hawlaha siyaasadda:

► Jaantus: Waddada Nidaamka Hirgelinta Siyaasadda Socdaalka Shaqaalaha



Sida lagu muujiyay jaantuska kor ku xusan, mudnaanta koowaad ee la siinayo hirgelinta siyaasadda shanta sano ee soo socota waxay ka koobnaan doontaa:

- Xoojinta hay'adaha, oo ay ku jiraan wasaaradaha, waaxyaha, hay'adaha dowladda (MDAs), iyo wada-hawlgalayaasha bulshada dhammaan heerarka kala duwan.
- Dhisidda nidaam xog ururin shaqeynaya (LMIS) si loo hagaajiyo maaraynta xogta suuqa shaqada.
- Hubinta in Shirkadaha Shaqaaleysiinta Gaarka ah (PEAs) ay u hoggaansamaan xeerarka la dejiyay.

Sannadka 2028, dib-u-eegis dhexdhexaad ah (mid-term evaluation) ayaa la sameyn doonaa si loo qiimeeyo waxqabadka siyaasadda iyo in la baaro fursadaha dib-u-habaynta. Wejiyada dambe ee hirgelinta siyaasadda waxay xoogga saari doontaa xoojinta nidaamyada dib-u-dhexgalka ee shaqaalaha soo laabanaya.

Marka la gaaro dhammaadka muddada siyaasadda, dowladda waxay hiigsaneysaa in ay:

- Ansixiso dhammaan heshiisyada caalamiga ah ee ILO ee wali harsan.
- Saxiixdo Heshiisyada Laba-geesoodka ee muhiimka ah (BLAs) la leh dalalka ay u badan yihiin shaqaalaha Soomaaliyeed ee dibadda u socdaalay.



# Dabagalka, qiimeynta kormeerka & qaab-dhismeedka natiijooyinka (M&E and results framework)

---

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) ayaa mas'uul ka noqon doonta hubinta hirgelinta Siyaasadda Socdaalka Shaqaalaha, iyadoo la raacayo qaab-dhismeedka natiijooyinka hoos ku xusan. Qaab-dhismeedkan wuxuu muujinayaa xiriirka sababaha iyo saameynta si loo gaaro natiijooyinka siyaasadda ee tobanka sano ee soo socda, isagoo adeegsanaya natiijooyin heer hoose oo ay gaari doonaan dhinacyo kala duwan iyo la-hawlgalayaal fulinaya, heer qaran iyo heer dowlad-goboleed.

MoLSA waxay hoggaamin doontaa isku-dubbaridka si loo xaqiijiyo in la tixgeliyo tuhumooyinka la sameeyay, kheyraadka la qoondeeyo, iyo in dhinacyada kala duwan si joogto ah uga warbixiyaan horumarka si tallaabo saxitaan ah loo qaado.

## 8.1. Ujeedooyinka iyo isticmaalayaasha qaab-dhismeedka natiijooyinka

Qaab-dhismeedka natiijooyinka wuxuu hagaya hay'adaha fulinta si ay si nidaamsan u gaaraan yoolalka iyo natiijooyinka laga filayo ee siyaasadda, iyada oo la adeegsanayo tallaabooyin ay kala fulinayaan hay'adaha iyo daneeyayaasha kala duwan. Qaab-dhismeedkan waxa uu u adeegaa ujeedooyinka soo socda:

1. Aqoonsiga hawlaha muhiimka ah ee mudnaanta la siinayo, iyadoo la eegayo xaddidaadda kheyraadka farsamo, dhaqaale, iyo agabka kale, iyo sidoo kale caqabadaha hawlgalka.
2. Horumarinta wada-shaqeynta iyo iskaashiga hay'adaha, iyada oo la xoojinayo mowqif wadajir ah iyo dhaqan-gelinta siyaasadda si wadajir ah.
3. Bixinta hab-hawlgal kaladuwan, iyada oo la qirayo in la-hawlgalayaasha horumarka ay yeelan karaan qaabab kala duwan oo ay ku hirgeliyaan siyaasadda

4. U adeegidda sidii dukumeenti tixraac ah oo lagu dabaqo kormeerka iyo qiimeynta, laga soo bilaabo heerka xogta aasaasiga ah (baseline), qiimeynta dhexe (mid-term), ilaa qiimeynta dhammaadka (end-line).
5. Taageeridda barashada joogtada ah iyo la-qabsiga xaaladaha cusub, si wax ka beddel iyo horumarin loogu sameeyo siyaasadda iyadoo lagu saleynayo xogta waxqabadka.

Cidda Ka Faa'ideysaneysa Qaab-Dhismeedka Natiijooyinka waa :

1. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, oo u xilsaaran guud ahaan isku dubaridka siyaasadda dowladda ayaa u isticmaali doona qaab-dhismeedkan tixraac si uu u qiimeeyo xaqiijinta hadafka siyaasadda ee la xiriirta himilooyinka qorshaha horumarinta qaranka. Habka Iskuduwidda Qaranku wuxuu heli doonaa jawaab celin ku saabsan waxqabadka siyaasadda inta lagu jiro kal-fadhiyada warbixinta
2. MoLSA, oo guddoominaysa Guddiga Isku-xirka Socdaalka Shaqaalaha, waxay qaab-dhismeedkan tixraaci doontaa marka ay soo bandhigeysa waxqabadka siyaasadda laba-jeer sanadkii iyo sanadle.
3. Wasaaradaha, Waaxyaha, iyo Hay'adaha Dowliga ah (MDAs) ee door muhiim ah ku leh fulinta siyaasadda, waxay u adeegsan doonaan qaab-dhismeedkan sidii hagaha waxqabadkooda.
4. Wada-hawlgalayaasha Bulshada (Social Partners) waxay ka faa'iideysan doonaan qaab-dhismeedkan si ay u hormariyaan ololeyaasha wacyigelinta, dhisidda is-afgarad, iyo la xisaabtanka. v.Daneeyayaasha Aan Dowliga Ahayn, sida Shirkadaha Shaqaaleysiinta Gaarka ah (Private Employment Agencies - PEAs), waxay warbixinaha sanadlaha ah ee waxqabadka u adeegsan doonaan qaab-dhismeedkan Dowlad Goboleedyad, waxay

Hab-Socodka (Flow Process) ee Qaab-Dhismeedka Natiijooyinka (Results Framework)

Si loo gaaro natiijooyinka la filayo, daneeyayaasha ayaa loo xilsaaray doorarka hirgelinta istaraatiijiyadan (Cutubka 6) waxay raaci doonaan taxane shan tallaabo ah sida hoos ku cad.

### **Tallaabada 1:**

#### **Tallaabooyinka siyaasadeed ee hay'adaha gaarka ah (Institution-Specific Policy Actions) waxaa lagu dari doonaa qorshayaasha shaqada iyo miisaaniyadaha:**

Iyada oo la tixgelinayo xaddidaadda kheyraadka, MoLSA waxay hagdooontaa Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Dowliga ah (MDAs) si ay u fuliyaan hawlaha mudnaanta leh sannad walba. Mudnaanta la siinayo waxaa lagu go'aamin doonaa iyada oo la raacayo Qaab-Dhismeedka Natiijooyinka (Results Framework Matrix) ee ku xusan dhammaadka cutubkan, waxaana go'aan ka gaari doona MoLSA iyo hay'adaha fulinaya. Tusaale ahaan, xiriirka caalamiga ah wuxuu mudnaan siin karaa taageeridda ururada jaaliyadaha Soomaaliyeed, xoojinta shabakadaha, iyo wax-ka-qabashada cabashooyinka shaqaalaha socdaalaya. MoLSA waxay mudnaan siinaysaa dhisidda Nidaamka Maareynta Xogta Shaqaalaha (National Labour Market Information System - LMIS) si loo hagaajiyo maaraynta xogta shaqaalaha socdaalaya. Dowlad Goboleedyada Federaalka (FMS) waxay muujiyeen daneyn ay u qabaan xoojinta awoodda waaxyaha shaqada ee heer dowlad-goboleed si ay uga jawaabaan baahiyaha shaqaalaha socdaalaya.

### **Tallaabada 2:**

#### **Aqoonsashada iyo u qoondaynta kheyraadka la-hawlgalayaasha fulinaya tallaabooyinka istiraatiijiyadda:**

Aqoonsiga iyo u qoondaynta ilaha fulinta hawl-hawlgalayaasha waxqabadyada kala duwan ee qaybaha iyo goobaha kala duwan, Xaaladdan oo kale, dhammaan la-hawlgalayaasha fulinta waxay u gudbin doonaan warbixinnada MoLSA ee ku saabsan hawlhooda sannadlaha ah ee mudnaanta leh iyo miisaaniyadaha. Warbixinahaan waxaa ku jiri doona tafaasiil ku saabsan ilaha maalgelinta, oo ay ku jiri karto taageerada la-hawlgalayaasha horumarinta ee meelo siyaasadeed oo gaar ah, marka lagu daro

maalgelinta MoLSA. Warbixinadu waxay sidoo kale bixin doonaan sawir muujinaya hawlaha la fulinayo, meelaha ay ku yaalaan, iyo sharraxaad cad oo ku saabsan faragelin kasta, oo ay ku jiraan ujeeddada iyo sababta laga leeyahay.

**Tallaabada 3:**  
**Dhisidda hab-raaca warbixinnada (Bi-annual & Annual Reporting) si loo la socdo horumarka la gaaray:**

Warbixinno laba-jeer sanadkii (bi-annual) iyo sanadle ah (annual reporting) ayaa la diyaarin doonaa, taasoo qeyb ka ah nidaamka la-socodka waxqabadka hay'adaha (institutional performance tracking). MoLSA waxay bixin doontaa qaab-warbixineed mideysan (Standardized Reporting Template) si ay Wasaaradaha, Waaxyaha Dowliga ah (MDAs), iyo Dowlad Goboleedyada (FMS) u fududeeyaan soo gudbinta warbixinnada joogtada ah. Warbixinnadaasi waxay dabooli doonaan dhinacyada soo socda:

Mgaca Mashruucka	Hirgelinta Siyaasadda Socdaalka Shaqada Qaranka	
Magaca Hay'adda iyo La-hawlgalayaasha Fulint		
Xogta Xiriirka Koowaad iyo Tan Labaad:	Agaasimse Guud	Mas'uulka Xiriiriyaha Mashruuca
	Magaca:	Magaca:
	Lambarka Taleefanka:	Lambarka Taleefanka:
	Iimaylka:	Iimaylka:
Taariikhda Bilowga Mashruuca :	<b>Taariikhda Dhamaadka Mashruuca:</b>	
Miisaaniyadda Guud ee Mashruuca:	<b>Wadarta Lacagta Dhabta ah ee La Helay:</b>	
Warbixinta Rubuca (Reporting Quarter) (e.g., Y1Q1)	Muddada Warbixinta (tusaale, Abriil 20xx - Juun 20xx)	
Taariikhda Soo Gudbinta Warbixinta:		
Sharaxaadda Hawsha La Fuliyey		
Natiijooyinka La Diiwaangeliyay		
Caqabadaha La Diiwaangeliyay		
Xal-Soo-jeedinta Wax-ka-qabashada Caqabadaha		
Tallaabooyinka La Soo Jeediyay ee Sanadka Maaliyadeed ee Soo Socda		
Codsiga Miisaaniyadda		

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) waxay ururin doontaa warbixinaha hay'adaha kala duwan waxayna diyaarin doontaa warbixin sanadeed, taasoo lagu soo bandhigi doono horumarka la gaaray, tallaabooyinka la qorsheynayo sannadka xiga, iyo saameynta kharashka la xiriira.

**Tallaabada 4:**  
**Ka Qaybgalka Shirarka Guddiyada, Kulan-Isku-dubaridka, iyo Wadahadallada si Kor Loogu Qaado Barashada Wadajirka ah iyo Horumarka**

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) waxay falanqayn doontaa warbixinaha lasoo gudbiyay (Tallaabada 3) iyadoo ka faa'iidayaanaysa xogta la helay si ay u soo bandhigto warbixino la xiriira guddiga isku-dubaridka qaran iyo Nidaamka Isku-dubaridka Qaranka (NCM) marka loo baahdo. Heerkan ka-qaybgalka wuxuu xoojin doonaa wadahadallada ku saabsan arrimaha soo kordhaya, jihada siyaasadda, iyo tallaabooyinka xiga ee la qaadi doono.

## Tallaabada 5:

### Diyaarinta Wejiga Xiga ee Faragelinta Sanadka Soo Socda – Iyadoo Lagu Saleynayo Waayo-aragnimada Hore, Casharrada La Bartay, iyo Xulashooyinka Horumarineed

Tallaabada ugu dambeysa waxay diiradda saari doontaa diyaarinta dhinacyada kala duwan ee la-hawlgalayaasha si ay uga qayb qaataan wejiga xiga ee hirgelinta. Tani waxay ku salaysnaan doontaa waayo-aragnimadii hore, casharradii laga bartay, iyo fursadaha lagu horumarin karo dadaallada socdaalka shaqaalaha. **MoLSA** waxay la tashan doontaa dhinacyada kala duwan si loo waafajiyo qorshayaasha waajibaadkooda, iyada oo la tixgelinayo mudnaanta, helitaanka kheyraadka, iyo xaaladda amniga.

## 8.2. Gaaritaanka Yoolka, Bartilmaameedka iyo Natiijooyinka

Marka la eego heerka ugu weyn, hirgelinta siyaasaddu waxay hubin doontaa in la gaadho natiijooyinka todobada ah ee soo socda:

### Tusiyaha Heerka Natiijada

Qaabdhismeed dhamaystiran oo loo siman yahay oo fududaynaya badqabka, nidaamsan, iyo socdaalka shaqada ee joogtada ah

Tilmaamayaasha heerka ugu weyn /Ujeedada

1. Xoojinta qaab-dhismeedka maamulka oo la xoojiyay oo la jaan qaadaya heerarka caalamiga ah
2. Xaqiijinta Shaqaalaha soo-galootiga ah ee la awood siiyay gudaha iyo dibedda ee leh xuquuqaha la dhowro.
3. Horumarinta xirfadaha kor u qaadida Xogta Shaqsiyeed (profiles) shaqaalaha soogalootiga iyo ka faa'iidaydiga.
4. Kor u qaadista isdhexgalka bulsho iyo ka mid noqoshada muhaajiriinta ee wadamada ay u socdaan.
5. Xoojinta maaraynta xogta la xiriirta socdaalka shaqaalaha, oo ay ku jirto Nidaamka Macluumaadka Socdaalka Shaqaalaha (LMIS) ee Soomaaliya.
6. Dhiirrigelinta doorka iyo wax-ku-oolnimada Soomaalida Qurbaha, si loo hagaajiyo kaalmadooda dhaqaale iyo xirfadeed ee dalka.
7. Nidaamyada la xoojiyey ee soo noqoshada iyo dib-u-dhexgalka shaqaalaha socdaalka ah.

### Qeybaha Muhiimka ah ee Natiijooyinka/ Soosaarka (Key Results/Output Areas)

1. Hirgelinta nidaamka isku-xirka qaran ee shaqaalaha socdaalaya.
2. Dhammeystirka iyo dhaqan-gelinta Heshiisyada Laba-geesoodka ah ee Shaqaalaha (BLAs) ee dalalka ay ku sugan yihiin shaqaalaha Soomaaliyeed.
3. Ansixinta iyo hirgelinta heshiisyadii caalamiga ahaa, borotokoollada, iyo ballanqaadyada aan wali la dhaqan gelin.
4. Xoojinta awoodda shirkadaha shaqaaleysiinta si loo hubiyo shaqo qorista cadaaladda ku saleysan.
5. Kormeerida iyo xakameynta shirkadaha shaqaaleysiinta gaarka ah, iyada oo la hirgelinayo hagitaan rasmi ah.

6. Taageerada la-hawlgalayaasha bulshada si loo dhiso habraacyo saddex-geesood ah oo shaqeynaya (wadahadalka, gogotanka shaqaalaha, sare u qaadista jawaabta baahiyaha shaqaalaha socdaalaya).
7. Xoojinta awoodda shaqaalaha socdaalaya si ay isugu abaabulaan, xuquuqdoodana u difaacaan, iyada oo la xaqiijinayo dammaanad qaadka amniga bulsho (Social Security).
8. Horumarinta nidaamka cabashooyinka iyo xallinta khilaafaadka si shaqaalaha socdaalaya ay si fudud u helaan cadaaladda.
9. Xoojinta shaqada kormeerka shaqaalaha, iyada oo xoogga la saarayo shaqo qorista, caafimaadka iyo badbaadada shaqada, magdhawga shaqaalaha, ilaalinta, iyo amniga bulsho ee shaqaalaha socdaalaya.
10. Dhisidda xafiisyo adeeg shaqo oo ku shaqeynaya nidaamka federaalka iyo dowlad-goboleedyada si shaqaalaha loo siiyo adeegyo shaqo raadis oo dhameystiran.
11. Maalgashi lagu sameeyay barnaamijyada xirfadaha horumarinta, kor u qaadista xirfadaha (up-skilling), iyo dib-u-xirfadaynta (re-skilling) si shaqaalaha socdaalaya gudaha iyo dibadda ay xirfado u yeeshaan.
12. Samaynta nidaam qaran oo aqoonsanaya shahaadooyinka xirfadeed si ay shaqaaluhu ugu shaqeyn karaan wadamada ay u socdaan.
13. Xoojinta doorka jinsiga (gender mainstreaming) marxaladaha socdaalka oo dhan, laga bilaabo ka hor bixitaanka, tababarka, imaatinka, ka dib imaatinka, dib u laabashada, iyo dib-u-dhexgalka.
14. Dhisidda nidaamyo hubinaya in shaqaalaha socdaalaya iyo qoysaskooda ay helaan macluumaad, waxbarasho, tababar, aqoonsiga xirfadaha iyo adeegyada maaliyadeed. Tusaale ahaan, xogta shaqaalaha socdaalaya oo lagu xareeyo Nidaamka Xogta Suuqa Shaqada (Labour Market Information System - LMIS).
15. Xoojinta adeegyada qunsuliyadaha iyo howlaha la-taliyayaasha shaqaalaha ee safaaradaha, qunsuliyadaha, iyo xafiisyada diblomaasiyadda.
16. Samaynta nidaamyo dammaanad qaadaya in shaqaalaha socdaalaya ay qaadan karaan xuquuqda amniga bulsho (social security benefits) meelkasta oo ay joogaan.
17. Dhisidda nidaamyo fududeeya wareejinta xirfadaha (skills transfer frameworks) oo loogu talagalay shaqaalaha socdaalaya, dibadaha uga dhoofaya, iyo kuwa soo laabanaya.
18. Abuuridda shabakado firfircoon oo jaaliyadda Soomaaliyeed ay ku mideysan yihiin si ay uga faa'iidaystaan shaqaalahooda, horumarkooda gaarka ah iyo kan dalkooda hooyo. Waxaa la taageeri doonaa dadaallada lagu xoojinayo helitaanka adeegyada maaliyadeed iyo adeegyada kale ee shaqaalaha socdaalaya.

Iyadoo la tixgelinayo in tilmaamayaal dheeraad ah lagu xusay shaxda natiijooyinka (results framework matrix) ee dhammaadka qeybtaan, Mudnaanta hirgelinta siyaasadda ee shanta sano ee ugu horreysa (2025-2030) waxay xoogga saari doontaa 22-ka tilmaamood ee heer-dhexaadka ah ee kor ku xusan, kuwaas oo warbixin sanadle ah laga soo saari doono Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA).


### 8.3. Qaab-dhismeedka Warbixinta (Reporting Arrangements)

Warbixinta fulinta siyaasadda waxaa lagu hagayaa habraacyo ku saleysan **Qaab-dhismeedka Kormeerka iyo Qiimeynta (M&E Framework)**. Habraacyadani waxay xaqiijinayaan la-socodka joogtada ah ee horumarka la gaaray iyo caqabadaha la kulmay.

1. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) waxay diyaarin doontaa warbixinnada waxqabadka ee sannadlaha ah, iyadoo xogta laga soo uruurinayo hay'adaha kala duwan ee heer qaran, dowlad-goboleed, iyo heer maxalli.
2. Dib-u-eegista waxqabadka sanadlaha ah waxay noqon doontaa hab rasmi ah oo lagu cabbiro horumarka la gaaray, waxaana warbixinnada loo gudbin doonaa shirarka Guddiga Isku-dubbaridka Shaqaalaha Socdaalaya (Coordination Committee on Labour Migration), ka dibna waxaa loo gudbin doonaa Nidaamka Isku-xirka Qaran (NCM).
3. Dib-u-eegista farsamo (Technical Reviews) waxaa lagu falanqeyn doonaa warbixinnada ay soo gudbiyaan hay'adaha fulinta, si loo aqoonsado meelaha u baahan wax-ka-qabad. Waxa kale oo ay xukuumadda ka caawin doontaa: Dejinta yoolal cusub. Dib-u-habaynta qorshayaasha. Qiimeynta baahiyaha maaliyadeed, farsamo, iyo kheyraad kale.
4. Dowlad-goboleedyada Federaalka (FMS) waxay warbixinnada horumarka ku soo gudbin doonaan labo jeer sanadkii (bi-annually), waxaana warbixinnadaasi la isugu geyn doonaa warbixinnada guud ee MoLSA.

### 8.4. Shaxda Natiijooyinka (Results Framework Matrix)

Natiijooyinka qaabka qaab-dhismeedka (oo lagu soo bandhigay boggaga soo socda) ayaa qeexaya qeybaha siyaasadda, faragelinta istaraatiijiga ah, wax soo saarka la filayo, tilmaamayaasha waxqabadka muhiimka ah, iyo hababka xaqiijinta. Waxa kale oo ay muujinaysaa malo-awaalka hoose iyo hay'adaha mas'uulka ah ee loo xilsaaray fulinta. Soo jeedintan bilowga ah ayaa dib loo eegi doonaa si xilliyo ah iyadoo loo eegayo habraaca maamulka siyaasadda. Matrixka faahfaahsan ayaa lagu soo bandhigay hoos:



► Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Xoojinta Socdaalka Shaqaalaha Soomaaliyeed

Qaybaha Siyaasada	Faraqelinnada Istiraatiijiyadeed	Hawlaha	Natiijada La Gaaray	Tilmaamayaasha Waxqabadka	Bartilmaameed	Qaabka Hubinta	Xaalad La Filayo	Mas'uulka Qaabiisan	Waqtiga Hirgelinta
1. Xoojinta Maamulka Socdaalka Shaqaalaha Iyadoo Laga Duulayo Heerarka iyo Xeerarka Shaqada Caalamiga ah	<p>1.1 Xoojinta Nidaamka Isku-xirka Qaranka (NCM) ee hoos yimaada Xafiiska Madaxweynaha, si loo hagaajiyo isku-dubariidka hay'adaha fulinta siyaasadda socdaalka, oo ay ku jiraan kuwa heer Dowlad-</p>	<p>Horumarinta iyo Hirgelinta Shuruudaha (ToR) ee Hay'adda Isku-dubariidka.</p>	<p>Go'aamada ay gaarto Nidaamka Isku-xirka Qaranka (NCM) ee horumarinaya socdaalka shaqaalaha waa la fulinayaa.</p>	<p>Tirada shirarka isku-dubariidka ee la qabto sanadkiiba</p>	<p>4 shirar isku-xir ah sanadkii, midkiiba hal mar sanadki ama hal sessex billod walba</p>	<p>Warbixinaha iyo dukumentiyada shirarka Nidaamka Isku-xirka Qaranka.</p>	<p>Ka-qaybgal firfircoon iyo iskaashi dhexmara daneeyayaasha.</p>	<p>Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.</p>	<p>2025-2026</p>
	<p>1.2 Bilaabidda wada-xaajoodka, xoojinta, iyo dib-u-eegista Heshiisyada Laba-geesoodka ah (BLMAS) iyo kuwa wadamo badan Multilateralka ah (MLMAS) ee Socdaalka Shaqaalaha, iyadoo lala yeelanayo dalalka ay ugu badan yihiin shaqaalaha muhaajiriinta Soomaaliyeed.</p>	<p>Horumarinta, wada-xaajoodka, iyo saxiixidda Heshiisyada Laba-geesoodka ah (BLAS) ee lala yeelanayo dalalka la beegsanayo.</p>	<p>Heshiisyada Laba-geesoodka ah (BLAS) ee la saxiixay oo la dhacay qelqeliyay iyada oo lala yeelanayo dalalka la beegsanayo.</p>	<p>Tirada heshiisyadii hore ee la cusbeyneysiin casriyeeyay iyo kuwa cusub ee la saxiixay, kuwaas oo waartaqsan Heerarka Shaqada Caalamiga ah (ILS).</p>	<p>5 Heshiisyo Laba-geesood ah (BLAS) oo cusub ama la cusbeyneysiin, la horumariyay, laga wada-xaajooday, lana saxiixay, kuwaas oo waafaqsan Heerarka Shaqada Caalamiga ah (ILS), inta lagu jiro muddada siyaasadda, cycle</p>	<p>Heshiisyada Laba-geesoodka ah (BLAS) ee la saxiixay iyo dukumentiyada dowladda.</p>	<p>Balanqaadka Go'aanka iyo diyaar u ahaanshaha Dowladda Soomaaliya, daneeyayaasha bulshada, iyo dalalka loo shaqo taqayo si ay uga qayb qaataan Heshiisyada Laba-geesoodka ah (BLAS) ee waafaqsan Heerarka Shaqada Caalamiga ah (ILS).</p>	<p>Wasaaradda Arrimaha Dibadda, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MOLSA), iyo Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga</p>	<p>2025-2029</p>

Qaybaha Siyaasada	Faragellinnada Istiraatiijiyadeed	Hawlaha	Natiijada La Gaaray	Tilmaamayaasha Waxqabadka	Bartilmaameed	Qaabka Hubinta	Xaalad La Filayo	Mas'uulka Qaabilsan	Waqtiga Hirgelinta
<p><b>1. Xoojinta Maamulka Socdaalka Shaqaalaha Iyadoo Laga Duulayo Heerarka Xeerarka Shaqada Caalamiga ah</b></p>	<p>1.3 Ansixinta ku-dhaqan-gelinta, hirgelinta, iyo warbixinta ku saabsan fulinta heerarka shaqada ee caalamiga ah ee la xiriira socdaalka shaqaalaha, oo ay ku jiraan heshiisyada, borotokooliyada, ballanqaadyada caalamiga ah.</p>	<p>Heshiisyada Caalamiga ah ee la xiriira Xuquuqda Shaqaalaha iyo Socdaalka: ILO C029 (Heshiiska Shaqada Qasabka ah, 1930) ILO C189 (Heshiiska Shaqaalaha Guryaha ka Shaqeeya, 2011) ILO C190 (Heshiiska La-dagaallanka Rabshadaha iyo Tacaddiyada goobaha shaqada, 2019) Borotokoolka Palermo, 2003 Borotokoolka Kahortagga, Xakamaynta, iyo Ciqaabta Ka-qanacsiga Dadka, Gaar ahaan Haweenka iyo Carruurta (oo ah lifaaq ka mid ah Heshiiska Qaramada Midoobay ee Dambiyada Aabaalulan ee Caalamiga ah, 2003) Borotokoolka Kahortagga Tahriibinta Muhaajirinta ee Dhulka, Badda, iyo Cirka, oo ah lifaaq ka mid ah Heshiiska Qaramada Midoobay ee Dambiyada Aabaalulan ee Caalamiga ah, 2004</p>	<p>Heshiisyada Caalamiga ah ee la xiriira Socdaalka Shaqaalaha ee la Ansixiyay.</p>	<p>Trada heshiisyada caalamiga ah ee la ansixiyay oo la ku-dhaqan geliyay.</p>	<p>3 heshiis caalami ah oo la ansixiyay inta lagu jiro muddada siyaasadda.</p>	<p>Dokumentiyada, diiwaangalinta sharciga ah, iyo barta internetka hay'adaha caalamiga ah ee ilaaliya heshiisyada (OHCHR, ILO).</p>	<p>Go'aanka iyo ballanqaadka dowladda ee ku aaddan dhaqan-gelinta heerarka shaqada caalamiga ah</p>	<p>Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Wasaaradda Qoyska iyo Xuquuqda Aadanaha, Wasaaradda Arrimaha Dibadda (MOFA), iyo Wasaaradda Caddaaladda.</p>	<p>2026-2027</p>

Qaybaha Siyaasada	Faraqalinnada Istiraatiijiyadeed	Hawlaha	Natiijada La Gaaray	Tilmaamayaasha Waxqabadka	Bartilmaameed	Qaabka Hubinta	Xaalad La Filayo	Mas'uulka Qaabilsan	Waqtiga Hirgelinta
